# GOLAHA WAKIILADA JSL

## WAAXDA HADAL-QORAALKA, GUDIYADA IYO GOLAWAYNAHA

**Kal-fadhigii 38aad fadhiyadiisii 6aad 7aad 8aad**

**05/06/10/11/2018**

**Quraanka: -** Md. Maxamuud Axmed Obsiiye

**Gudoonka: -** Gudoomiye, Baashe Maxamed Faarax.

**Ajandaha Fadhiga: -**

- **Doodda Xog-ogaal U noqoshada Xaalada Dalka**

**Gudoomiyaha: -** Mudanayaal waxaan u balan sanayn Ajandaha Qodobkiisa 3aad ee Xog-ogaal u noqoshada Xaalada Dalka, xildhibaanada raba inay ka qaybqaataan Doodda ha is qoreen xog-hayntuna ha u qaybiso waraaqaha.

**Md. Cabdiqadir X. Ismaaciil Jirde** *(13 min, 12 seconds)*: **-** bismilaahi Raxmaani Raxiin, Horta mawduucani waa mawduuc baladhan, waana mawduuc fariin badan leh, dadbadanina wey iga danbeeyaan. Waxaan ka bilaabayaa oo maalmahan aad xaasaasi u ah, mandaqada waxaa ka socda isbadalo waaweyn oo aan wali sal-dhigan dhinac ay qaban doonaan iyo wax ka soo bixi doonana aan la garanayn, markaa taa waa in foojigadeeda la lahaado oo la ogaado dalkaa dariskeena ah isbadaladaa ka socda waa in aan ogaano afkaarta iyo waxay ku salaysan yihiin in aan ogaano oo dawladii tan ka horaysay waan ogayn oo qoraaladooda ayaynu heli jirnay oo dadkii dabada ka riixayay afkaartaa ayaan ka war haynay, laakiin tan garan mayno wax road map ahna imika sooma muuqdo, waxa laga hadlayaana waa reginal integration taas oo ay ka faa'iidaysan karto dawlad ay u dhisanyihiin institutions keedu taana inagu ma nihin inaga iyo dalkaa walaaleheena ahiba. Hadii uu sidaa ku bilaabmo integrations kaasi inaga oo aan shuruuc adag lahayn waxaynu noqonaynaa Badawgii subaga laga Darsaday, waxaan noqonaynaa meel cidwalba ay ka tukaansato waana in taa lagu baraarugsanaado.

Ta kale waxaa waaye maalin dhaweyd waxaan ka qayb galnay shir ay wasaarada arimaha dibadu soo qaban qaabisay oo ay ka soo qayb galeen dad badan oo aqoon yahano ahi, dadkii joogay waxaa ka mid ahaa ninkii la odhan jiray IQBAAL oo wakiil inooga ahaa South Africa dalkana wax badan ka ogaa oo Dogtrot iyo BHD-gaba ku qaatay mawduuceenan hadana safiir u ah dawladiisa waxaa uu ka soo sheekeeyay dadaaladeenii iyo halkii ay marayeen befre 2010-kii, aniga oo soo koobaya waxaa uu yidhi 2010-kii waxaynu joognay albaabka iyo in observer's la inooga ogolaado EU-da oo

waliba dawlada Somalia la ogolaysiiyo in ay aqbasho midhkaa, intaa wixii ka danbeeyay wixii dhacay waad ogtihiin oo arinkaasi halkii ayuu ku hakaday waliba kuma ha kani 10sano ayuu dib u dhacay 2017-kii ayaa woxogaa yab-yabasho ah oo Iyana aanay qaadayn dariiqii saxda ahaa, markaa waxaan leeyahay waa in arinkii dib loogu noqdaa loona talo badsado oo dadbadan oo wax ka qaban karaa ayaa golahan fadhiya, xisbiyada ayay ku jiraan bulshada inteeda kale ayay ku jiraan oo dadkeena dibada jooga ayay ku jiraan ee waa in qof iyo laba aan lagu koobin golahana waa in uu doorkiisa ka qaataa.

Sida aan ka wada war-qabno waxaa inagu socda colaado ay ka mid yihiin Tuko-raq, oo barigii dhaweyd waa kuwii inoo yimid EU-da iyo UN-ta oo shalay oo u danbaysay waxaa inala joogay ninka cusub ee loo soo magaacay, anaga oo jaanis u helay in aan la kulano iyaga oo xogo ka urursanayay arinkaa tuko-rag, doorashooyinka iyo xeerka kala dhiman ee ka hadlaya kootada aniga oo aan xisbi ka wakiil ahayn ee ah xildhibaan matalaya golaha wakiilada ayaan u sheegay halka uu marayo.

Waxaa kale oo jirta shalay waakii wasiir inoo yimi si wanaahsana uu wax inoogu sharaxay, laakiin su’aalo muhiim ah oo ay ahayd in aan weydiino ayaynaan weydiin oo ahaa Qalabkaa kharashka ku baxay? Cida inaga caawisay? Iyo in uu qandaraas daahfuran in uu ku baxay iyo in kale oo su’aashaasi na dhaaftaye bal in uu shir gudoonku noo soo helo ama gudidda maaliyadu ay noo soo hesho. Suaashii aan weydiiyay waxay ahayd shirkaduha faraha kalama baxaan wasaarada, oo lacag ay shirkaduhu leeyihiin aanay wasaaradaa galin in laga digtoonaado.

Ilaahay ha inaga qaboojiyo oo Ceel-afweyn wax ayaa ka soo noqday in alle inaga qaboojiyana waan baryaynaa, tii dhumay iyadu fareheena wey ka baxday dhibaatana maaha in ay soomali oo dhami iskugu timaado, oo wuxu markuu kaa tan roonaado waa loo qayshadaa ee yaynaan wax dhibaato ah ka dhigin in meel-walba laga yimi waana in ay xukuumadu ku niyad samaataa dhiig islaam ayaa daadanayee in cid walba ay soo gasho.

Waxaa timid tan sixir bararka oo aad moodo in loo maaro waayay isga oo wakhti xuna ina soo qabtay iyada oo dadkeenuna uu daaduun ku yimi tuulooyinka iyo magaalada, inta uu saamaynayaana waa inta uu waxa soo galaa aanu doolar ku jirin cidina ayna waxba u soo dirin kirana aan ku qadaadan. Madaxweynuhu wuu ku amaanan yahay in uu meelo badan fufeeyay, laakiin lacagtu in ay iska taalaa waxba tari mayso ee waxay waxtaraysaa marka ay dadka gasho. Dadkaa kumanaanka ah ee magaalooyinka soo dagay ee rajo beelka ah waa in miisaaniyada wax loogu daraa dadkaa gobol walba dul fadhiya iyada oo ay lacagta xafidaadeedu wanaagsan tahay hadana waa in ay midho dhal keentaa.

Dadkani waa mid aah wado leenahay ilaahay idankii xukuumadahan kuwo ka danbeeyaana wey imandoonaan mana jeclin in ay kuumadan wax ka xumaadaan oo waxa ka xumaadaa waa mid inaga wada xumaanaya inkastoo ay raga qaar moodayaan in ay xukuumada naga xigaan ee mid aan u simanahay, asxaabtu waa kuwo ku dhisan xeer iyo Dastuur talana way leeyihiin waana in taa la isku ixtiraamaa oo wixii sax ah ee ay sheegaan waa in laga garaabaa wixii qalad ah ee ay sheegaana waa in la iska bogsiiyaa ee aanay midi midi ku taag aanay noqon ee dadkeenu wuu jilicsanyahaye yooyootankaana waxay moodayaan in lagu kala tagayo laakiin maaha mid lagu kala tagayo.

Hadii aan soo qaato jab-hada halkaa ka bilaabantahay fili maayo in ay xisbina Taageero ka haysato, xisbi ku ogolina ma jiro, wax reer u yaalana maaha ee waxaa wax inoo wada yaala waana in talo laga wada yeeshaa oo ninkii talo u haya siday u qaboobayso la dhaysto, hadii loo mara waayana halkay tagaysay tagaysaaye waa in loo dadaalaa, maantana cahdigii jabhadana waa ka sii dhaafay, markaa waxaanu ku boorinaynaa in cidii wax ka gaysan kartaaba ay wax ka gaysato, dawladuna iyadaa indho qudhaanjo lehe iyadaa halkay u marayso inaga taqaane ay u marto oo iyada lagu ixtiraamo sidii ay xal-ugu heli lahayd laguna taageero waa mid aan soo jeedinayo.

Arinta tuko rag xuduudka inaga iyo buntland inoo dhexeeyaa waxaa uu ahaa xuduud uu isticmaar samaystay, markii aay Somalia ku biirnayna waxaa uu ahaa xuduud sidii sii u jira lakiin xuduud gudeed ah ayuu noqday maanta laba dawladood ayay yihiin markaa dawlada xuduud kaligeed badali kartaana ma jirto. Markaa waxaa fiican in dadka halkaa degan oo culayska ugu badani ku dhayana laga daayaa oo dad walaalo ah oo xuduudi u dhexeeyo waa in ay noqdaan, waxaanad moodaa Somaliland inteeda kale in ayna ku baraarugsanayn in reerkaa dhibi haysato, waa in taas lagu baraarugsanaadaa in ay labada dhinacba ka gubanayaan ee waa in ka soo dhaweeyaa oo misaaniyada wax loogu daraa, caalamkana wax loogu doonaa ee ayna noqon nin iyo Raqdii loo kala tag, taasina waa mid aan ku talinayno. Wasaaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatuh.

**Md. Siciid Maxamed Cilmi** *(24 min, 04 seconds)*: **-** Bismilaahi Raxmaani Raxiin Gudoomiyaha shirgudoonka, xildhibaanada Shaqaalaha, Saxaafada, iyo inta imaqlaysa, imaqli doonta ama I akhriyi doonta dhamaantiin Salaamu Calaykum,

Anigu waxaan ka bilaabayaa arimaha deegaanka, in kastoo ay hay'adaha deegaanka inoo qaabilsani ay hawl fiican ay baryahan wadaan, hadana waxaad moodaa in ay ka baahad weyntahay, ayna u baahantahay gurmad ee ayna ahayn mid lagu eegi karo hay'adahaa deegaanka ee aynu ingu (Gole ahaan) aynu ka qayb galno waxaanan soo jeedinayaa siyaabaha aan uga qayb gali karno. Laakiin xaalada taagani maxay tahay? Xaalada

taagani waxay tahay ee ayna dadbadani ku baraarug sanay ee ah time-bum ina hoos yaala waxaa ugu horeeya QASHINKA oo waliba ah qashinka noocyada khatarta ah ee ay ka mid tahay BACDU oo ay imika shaqo fiican ay ka qabteen dawlada hoose iyo wasaarada deegaanku oo ay amaro badan ka soo rogeen, aradaasina ay dhaqaaqeen in kastoo aanay wali si fiican u hawl galin.

Bacda iskaga warami mayno dhibka ay leedahay, waxaa kale oo jira kana mid ah khataraha waaweyn ee jira qalabka gaadiidka iyo tilifoonada duuga ah ee la inagu caawiyo sida mid aan maalin dhaweyd ka qayb galay oo ahaa koontiinad qalab caafimaad ah waxaana la socday konbuyuutaro la yidhi qolooyinka Diaspora-ha ah ee xarfaanta isaga keen dhiga oo la yidhi isbitaal ku yaala Yurub allaabtii uu iska fanishayay ayuu Ngo Soo siiyay oo ay kamid ahaayeen sariiro iyo kuraasta curyaamiinta lagu riixo oo aan malaha 40% inta ka caafimaad qabtay.

Yurub oo hada mushkiladaha ugu waaweyn ee haystaa ay tahay Qashinka waxaad moodaa in ay maaro u heshay oo waxaa lagu caawiyaa Afrika. Sariirahaa iyo qalabkaasi intooda badan waxay ahaayeen xaalad ka bax. Oo ilaa xadkaa ayay gaadhay in mucaawimadii ay noqoto qashin, iyaga ka warami maayo gaadiidka dhulkeena marayaa tirade uu leeyahay iyo xaaladiisu sida ay tahay oo meel walba isaga oo iskaraab ah ayuu tuman yahay, waxaa kale oo uu ka qayb qaataa wasakhaynta hawada, oo maanta hadii aad magaalada Hargeisa aad ka baxdo oo aad u baxdo meelahaa Miyiga ah waad dareemaysaa in ay hawadu is badashay.

Arinta kale ee ka sii darani waxa waaye Tilifoona oo hadii aad suuqa u baxdo waxaad arkaysaa tilifoono xaalada ka baxay oo ay ka mid yihiin kuwii aataynka yari ka taagnaa oo jawaano lagu sido oo $5 doolar iyo $7doolar la siinayo, bal gala Internetka oo waxaad eegtaan tilifoonada gaboobay dhibaatada ay ku hayaan dunida ilayn waxba dunida uma kala qarsoone, waxaa kale oo aad ogaan doontaa in shirkado iyo hay’ado loo sameeyay oo ay ka hadlayan sidii loo aasi lahaa ama qaabkii dib loogu isticmaalilahaa waxaana la isla gartay in tilifoonadaasi ay sunbadan leeyihiin ina suuqa ayay inoo yaalaan iyaga oo siduu huudhaydhka joonyado ku jira.

Hadii aad eegto baytariyada oo 8sano ee aad gudida Degaanka gudoomiyaha u ahaa aan soo arkay ee aan khibrada u leeyahay ama dhibka ugu badan ahaa baytariyada oo marka uu qashinka noqdo uu yahay SUN, inana waxaa la inoo keenaa kuwii ugu tayada liitay oo marka uu qofku istimaal is yidhaa uu u shaqaynayo dhar Casho lana tuurayo oo intaas oo kun oo baytari ayaa soo galaysa qashinka maalin walba. Hadaba arimahaa iyo kuwo badani maxay u baahanyihiin? Waxay u baahan yihiin Go’aamo ayaynaan ku eegan karin Wasaaradaha iyo hay’adaha ee kaliya ee ay u baahan yihiin in ay Xeerar ahaan halkan

uga baxaan, khasabna maaha in uu xeerku noqdo buug dhan oo la inoo keeno weynu go'aamin karnaa 3,4 bayj oo aynu waxyaabaha qaarkood ku control-layno.

Marlabaad oo ah talo soo jeedintayda in miisaaniyada 2019-ka aynu hal-kudhag uga dhigno Deegaanka iyo shaqo abuurka waa rayigayba, waana in miisaanid loogu daraa ka hortaga arimahan. Sidoo kale waa in la yodhaa dhinaca gaadiidka gaadhiga modelkiisu uu ka horeeyo 10sano waa in laga mamnuucaa dalka soo galidiisa si wasakhawgii hawada iyo qashinkiisaba loo ilaaliyo, sidoo kale in baytariyada tayadoodu noocaas tahay aan wadanka la keeni karin, waxaa kale oo aan isla qaadan karnaa in aan la soo dajin karin mucaawimo khashin ah oo waliba cashuur dhaaf loo sameeyay ee degada lagu joojiyo arimaha deegaanka,

Arimaha Siyaasada oo aan kaga hadlayo arimo rayi ahaan aan anigu qabo oo ay ka mid tahay arinta khaatumo iyo Somaliland maadaama oo aan ahay wakiil ka tirsan Deegaankaa waxaan u arkaa in wado hadalkaasi uu istaagay istaagidiisuna, ictiraaf ayaynu raadinaynaa oo dunidu waxay qiimaynaysaa institutionska iyo siyaabaha uu u dhisanyahay oo inaga gudeheenii hadii ayanaaan heshiis ahayn ictiraaf imanaya ninawna ha ku hamiyin ictiraaf imanaya, waad ogaydeen Prof Cali Khaliif Galayd oo ah Xubnaha ugu miisaanka weyn Somaliland iyo dhulka soomalidaba wuxuu u soo guntaday in uu heshiis meel mar ah la galo samaliland waana la galay heshiiskii iyada oo qodobada qaar uu fuliayay madaxweynihii hore ee samaliland qaarna waxaa fuliyay oo aan uga mahad celinaynaa Madaxweyna Muuse Biixi Cabdi laakiin waxaa dhiman qodobadii ay dadku fahmi lahaayeen ee siyaasiga ahaa.

Kaw waxaa ka ah arimaha Furitaanka Dastuurka oo hadii aan la furi ayna goboladaa iyo soomaaliland ayna heshiinayn anaguna way adkaanaysaa in aan Golayaasha sii Fadhinaa, hadii aan siyaasiyan loo heshiin oo aan dastuurka la furin, markhaati beenaale danbana kama samayn karno Dadka, waxayna u baahantahay bal tuusle ahaan waxaad u eegtaan marka aad ka timaado khaatumo ahaan arinka saami qayb siga oo mar walba kala riixaysa oo diidani ilayn siyaasiyiin ayaynu nahaye waa beesha dhexe. Ma idin la tahay hadii hada Somaliland la aqoonsado oo aynu kala baxno samalia in inaga oo aynaan dhecdeen heshiis ahayn maxaa dhixi kara.

Hadaba waxaa la yidhi saamiga hala qaybiyo oo Sadex nin oo beesha dhexe ah ayaa waxay samaysteen sadex xisbi oo waliba leh waan idiin shiraynaa oo halkaa soo fadhiya taasi ma macquulbaa? Anigu shakhsiyay waxaan ahayn nin Somaliland ah oo waliba niman badan oo beesha dhexe ah kalarka ku haya oo fadhi leh ayaan ahayn, laakiin wax wada qaybsigii iyo wakiilnimadii aan dadka ka ahaa ma sii wadi karo waxaan idiin

sheegayaa shakhsiyan ma garan karo saaxiibadayda kale e hadii hawshaa si degdeg ah wax looga qaban waayo in aan is casili doono taasna halkaa ayaan kaga baxay.

Ta xisbiyada ku saabsan in kastoo qaar I dacaayadeeyaan oo ay yidhaahdeen odaygu sadexda xisbiba wuu soo maray, inkastoo aanan waxba ka sheegi karin labada oo midina uu golahan gudooomye u ahaa midina uu gudoomiye ka haa xisbigii aan ka soo baxay oo wixii aan odhan lahaa waxaan doonayaa in aan dhagta isaga u sooro, yaan loo qaadan kalmadahaa aan odhanayo in aan iyaga ku weerarayo waana laba oday oo karaamo iga mudan oo aan qadarinayo sida aan u qadarinayo madaxweynaha, laakiin maalmahan sida ay u hadlayeen iyaga iyo qaarbadan oo ka mid ah xisbiyada Mucaaridka ahi maan jeclaysan.

Dalkani waxa uu u baahanyahay in wixii khilaaf ah ee yimaada in si qunyar ah loo wado, wanan uga mahad celinayaa Cabdiqaadir jirde sida fiican ee uu u dhigay waxaynu u baahanahay in ay wada tashi kuwada socono lakiin midbaa Meesha taala balhada arintaa u fiirsada waxaa laga qaylinayaa madaxweynihii labadii xisbi muu dhagaysan? Madaxweynaha maxaa looga baahnaa?

1. Waxaa madaxweynaha looga baahnaa in uu soo gudbiyo xeerkii lagu dhaqi lahaa doorashooyinka wuuna soo gudbiyay oo wuu inala yaalaa.
2. waxaa looga baahnaa in uu miisaaniyad ugu talo galo oo waxaa lagu xukumay 4milyan waxaanu bixiyay 2milyan sida aan kawada warqabno oo uu ku wareejiyay gudiid doorashada
3. Waxaa looga baahnaa in uu iskugu yeedho daneeyayaasha Doorashooyinka tiina wuu qabtay.

Soomaalidu waxay tidhaa hasha diidaysaa maqaarka meel xun ayay ka ursataa, in diidmo uun lagula dul wareego oo hadeer kuwan kala eri xildhibaanadii Golaha wakiilada ayaynu nahay xeerkana inagaa samaynay;

**Point of order: - Cabdiqaadir jirde*: -*** xaalada dalka ayaynu ka hadlanaaye halkan loogu garnaqi maayo asxaabta mucaaradka ah iyo Madaxweynaha e garnaqaasina waa meel gaar ah waana gudi loo saaray laakiin hadii garnaqsi yimaad waanu ku soo noqonaynaa waananu gar naqsanaynaa.

**Md. Siciid: -** waad mahadsantihiin waa xaaladii dalka walibana waa xaalada ugu adeg ta ku saabsan Komishanka iyo kala diristooda xildhibaano ayaynu nahay xeerkana inaga ayaa samaynay markaa dadkii xeerka iyo dastuurkaba ilaalin lahaa waa inaga dastuuriyan, xeerka qaabka loo soo eedaynayo komishanka xeerka ayay ku cadahay oo

madaxweynhu inta uu iska soo fadhiisto warqad ma qori karo iyaduna halkaa ayay taalaa.

Xisbiyadu wey u tageen oo waxay yidhaahdeen 9kadhig ma Muusaa ku dhici kara oo sagaal ka dhigi kara iyada oo aniga iyo xildhibaanadu xeerka wax ka badelin muuse xagee ayuu ka keeni karaa, madaxweynuhu ma keeni karo sharcina maaha, waliba anigu waan qabaa in 9xubnood laga dhigo laakiin sidii looga dhigi lahaa lakiin Faysal iyo cirro inta ay hor fadhiistaan sidii hallow hallowdii barigii hore ee 6-da 5 kadhig noqon maysee waxaa waaye xeer ayay u baahantahay;

**Point of order: - Cabdiqaadir jirde: -**
**Gudoomiye Baashe: -** waan kaa diiday cabdiqaadir, xildhibaan hadalkaaga sii wado

**Md. Siciid: -** anigu waxaan se ka digayaa hadii hadaladu gaadhaan qaab looga hadlo fad-qalalo iyo go'aano qayru Dastuuriya oo dalka lagu qasayo iyada oo ay dhibaatooyink akale ina haystaan oo ay gaadho shir qaran ayaanu qabsanaynaa, shir qarana waxaa qaban kara madaxweynaha oo kaliya? Markaa shir qaran ayaan qabsanaynaa waa fad-qalalo waa qayru dastuuri, waa fidno (secondment). Sidaa darteed odayaasha saaxiibaday labadaydii gudoomiye anigoo qadarinaya waxaan ka codsanayaa in ay eraygaa dadka ka raali galiyaan dibna uga noqdaan.

Xaalda dhaqaalaha ee guud wuu ka hadlay x. abdiqaadirna sixirbararka waxay ka mid tahay xaalada dhaqaale ee gobolka oo jasiirada la yidhaa somalilad oo ka go'am dunida ama gobolka kuma noolin oo dhaqaalada wadamada jaarkeenu sidaa ayuu u baaxaa degayaa, lakiin hadii aad eegtaan baanka mudooyinkii sideed bilood ahayd ee aan soo dhaafnay hal meel ayuu taagnaa Rate-ku waana meelaha laga eego wax oo la yidhaa ma kacay, waana hawl iyo shaqo la hayo waxaa uu ku taaganyahay.

Dhawaan waxaan filaynaa anaga oo ah gudii dhaqaalaha iyo maaliya oo wax bixinana ka hayna in ay bilaabaan talaabooyinkii hoos loogu dhigi lahaa, markaa waxaa guul ah oo aan waliba ku bogaadinayaa baanka in uu ku hayay mudo dheer halkaa, xukuumadana waxaan ku bogaadinayaa, inaga oo wax badan ka hadalnay raadkeenii dib u eega waxaynu ka hadalnay institution dhaqaale oo dedweyne lagu wareejiyay madaxweynuhu waxaa uu ku dhiiraday in uu dib u soo qarameeyo institution dhaqaale ee aan lahayn dad ayaa ku tagri fala oo si qaldan ayaa loo bixiyay oo ay ka mid ahaa yeen Maadaarka, Haamaha shidaalka, laabkii iyo meelo badan.

Waxaa kale oo 8bilood dib loo soo celiyay Nidaamkii dhaqaale oo waxaa jira PFM (public Finance Management) system-kaa oo dhamaantii ka duwan kii sanadkii hore loo maamuli jiray maaliyada, waxaaanan jeclahay in aan halkan ku soo casuuno wasiirka oo

ay sharaxaan. Waxaa kale oo Iyana la soo celiayay qandaraasyadii qaranka oo sida aan maqlaysee dhawaanahay ilaa 12 mashruuc oo la baahinayo, waxaanad arkaysaa in 8daa bilood in nimadaamkii wanaagsanaa lagu soo noqday ayaad arkaysaa. Waxaa kaliya oo aan xukuumada iyo madaxweynaha kula talinayaa in shaqo abuuristii ay balan qaadeen in ay halkeedii ka sii wadaan, xakamaynta sixirbararka way xakameeyeene in ay hoos u dhigaan, waxaan kale oo aan ka mid ahay gudidii u baxday dhinacaa galbeedka iyada oo ay barigana soo mareen qolo kale waxaa soo aragnay gobolka awdal oo kale in dakhligu uu aad u kordhay iyada oo dadaal badana la galiyay oo aan ku amaanayo meelaha qaar sida degmada boorame oo kale oo 71% uu kordhay dakhliga cashuurada barrigu aad ayaad u mahadsantihiin.

**Md. Siciid Cartan Cismaan** *(11 min, 50 seconds)*: **- shir** gudoonka iyo mudanayaasha waad salaaman tihiin waxaan leeyahay shir gudoonka waa inay doodeena ka soo baxaan go, aano saameyn ku leh qaranka marka dooda noocan oo kale aynu galno dooda badan oo horena waynu galnay halkii lagama qaadin, wax najiijo ah oo kasoo baxay ma jiraan waxay rajaynaynayaa go, aamo qaranka wax taraa inay ka soo baxaan.

Anigu saddex qodob ayaan ka hadlayaa oo arimaha bulshada oo nolosha dadka saameyn ku leh, sharcinimada lacagtii maalintii dhaweyd la kordhiyey ee cashuurta lacagtan dadka aad iyo aad culeyska ugu ah ee bilaydh namberka iyo xaaladada biyaha ee hargeysa manta halka ay mareyso iyo dhibaatada ka taagan iyo nabad galyada intii ilaahay igaransiiyo ayaan wax ka taataabanayaa.

Hadaan cashuurtaa ka hadlo cashuurtaasi waxa waaye dalku shuuruuc iyo nidaam ayuu leeyahay cashuurtaas anigu waxaan qabaa ee uu wasiirku kordhiyey ee uu u kaashadey xeer no72 qodobkiisa 52 inay tahay qayrul sharci lacagtaa umada laga qaadayaana ay baadil tahay anigoo doodayda saldhig dhig uga dhigaaya qodobo distooriya sadexda qodob ee distooriga ahna halkan ku cadeyn doona inay lacagtaasi lacag baadil ah tahay majarihii loo baahna inay marto aanay marin anaay majara halawsan tahay.

Qodobka 14aad ee cashuuraha ee takaaliifta ribada ee dastuurka wuxuu sheegayaa qodobkiisa 1aad waajibinta cashuuraha ee wixii takaaliif ah waxa loo eegayaa danta iyo maslaxada bulshada horta cashuurta waxa loo eegayaa sidaa dastuurka qodobkiisa 14aad qodobkiisa 1aad ku cad marka la kordhinaayo danta iyo maslaxada umadaa waar dadku ma qaadi karayaan waxaynu ognahay dalku duruufaha dhaqaale ee aynu ku jirno iyo baahida iyo dhibaatooyinka dhaqaale ee jira in aanay manta umadu cashuur lagu kordhiyo aanay manta umadu qaadi kareyn.

Qodobka kalena waxa waaye ee lambar 54 awooda xeer dajinta golahu ee arimaha maaliyada maaliyada waxay gaadhsiisan tahay qodobkiisa 1aad ee jidaynta cashuuraha ee takaaliifta iyo talaabooyinka kale eekor loogu qaadayo dakhliga taasina waxa waaye awooda baarlamanka labadaas qodob waxay cadaynayaan ama ay ka hor imanayaan

qodobkaas uu wasiirku gundhiga uga dhigay cashuur kordhinta qodobadaa distooriga ah ayay ka hor imanaysaa sidaas daraadeed waxaan qabaa anigu inay cashuurtaasi baadil tahay waxaana burinaaya xeerka uu gundhiga uga dhigaayo Xeer. Lr 72 xeer lr 128 xeerka saldhiga iyo kala sareynta distoorka oo sheegaya distoorka ayaa ugu sareeya xeerarka dalka xeerkii kasta oo ka hor imanayaana waa waxba kama jiraan markaad qodobadaas eegto dhamaantood uu ka hor imanayaa xeerka uu gundhiga uga dhigaayo takaaliifta la kordhiyey waxaan qabaa sidaas markay tahay inay cashuurtasi tahay qayral sharci umadana laga joojiyo gudoomiyuhu wuxuu yidhi gudi ayaan usaarey cashuurtaa laba gudi ayaa ka wada hadlaya gudi baarlamaanka ah iyo gudi maaliyada ah gudoomiye waxba ka qabno waxa dhaqan unoqotay golahan in waxii gudi loo dhiibo oo aan dib loo arag anagoo u aragna xataa hadii gudi loo saaro inay ahayd in la hakiyo hadii gudi loo saarey waxaanu qabna in la mudeeyo oo bal mudada lagu hor keenayo golaha ay noqoto wax xadidan inkastoo hawshani ahayd hawshii golahu inuu go,aan ka gaadho ay ahayd aanay wax daba furan oo la iska haysto ee laakiin la mudeeyo oo lidhaahdo mudadaas ayaa golaha lagu hor keenayaa.

Waxaan u gudbayaa qodobkayga 2aad oo ah xaalada biyaha hargeysa ku sugan tahay hargeysa waxay ku sugan tahay xaalad aad iyo aad u adag oo dhibaato ah oo ka haysta xaalada biyaha, biyaha 27kii sanadood ee ay jirtay samaliland intaas oo mashruuc ayaa lagu maal galiyey biyaha hargeysa inay dadku biyo helaan, biyo la, aantasi waxay mugdi galinaysaa caasimadnimada hargeysa ayey runtii mugdi weyn galinaysaa dadkana dhibaato aad iyo aad ah ayey ku haysaa.

Mashaariicdii ugu waaweynaa ee la inagu caawiyey waxa ka mid ah mashruucii xumbo weyne oo ay ku baxdey malaayiin dollar, mashruucaasi waxa uu ka koobna wax lagu sheegay biyo xidheen oo imika isku badelay god xashiishka lagu guro oo bacaha xashiishka hargeysa ka tagaa ay ku ururaan oo wax uu qabtaa aanay jirin iyo ceelalkii biyaha loogu tala galey in laga helo in iyagana laga guurey, lacagtaas waxay ahayd malaayiin dollar oo imaaraadku nagu caawiyey oo qaranka wax tari lahayd ayay ahayd sidii la rabay in umadan wax loogu qabto looguma qaban.

wasiirka biyuhu wuxuu cadeeyey in mashruucaasi fashilmay hadduu fashilmay laakiin sababayntii iyo sababtii uu ku fashilmay la inooma qeexin anagoo qabna hanti badan oo mashruucaas loogu talagaley la lunsadey meesha ay ku baxdey iyo sababta ay ku baxdey iyo qaabta loo lunsadey midna muu cadeyn mashruucaas wuxuu sheegay uun inuu fashilmay, xukuumada waxaanu uga fadhinaa lacagtaasi lacag caawimo ayay ahayd oo loogu tala galey in umadaas masaakiinta ah inay biyo ku hesho loogu talo galey ahayd in la cadeeyo mashruucaas malaayiin dollar ku baxdey in sababta uu u fashilmay iyo halka uu ku danbeeyey warbixin laga helo ayaanu xukuumada ka doonaynaa ta kale waxa imika jirta mashruuc aynu mudo sugaynay, mashruucaasi wuxuu ahaa isaguna biyo balaadhinta ayuu ku jirey mashruuca jarmalka ayaa nagu caawiyey dhawr iyo

labaatan milyan waaye mashruucaas badhkiisii markii la bixiyey waxaa ka dhashay muran badan qaabka loo maamulay wuxuu ahaa si aan cadaan ahayn muran badan iyo ceeb badan ayaa ka dhacdey qoraal baa loo qorey nayroobi qoraalo badan ayaa imiday mashruucaa badhkiisii dood badan iyo muran badan ayaa ka dhacay salaasadii dhaweyto ayaa wax la isku jacburiyey saaxiibkay nacnac habeenkii dhaweyto uu fadhiyey haduu xog ka hayo isagaa ka warami

Mashruucaa waxa la siiyey shirkad jarmal ah, mashruucaa markii la sharxaayey waxa la yidhi inanka maareeyaha biyaha ahi wuxuu sheegay in hargeysi saddex sannadood intaas oo jeer oo hore oo aynu u yeedhnayna waxa la ina lahaa sannadkan ayey biyo ku hellaysa hargeysi wuxuu cadeeyay in aanay saddex sanadood uu mashruucaasi qaadanayo waliba haddii ay duruufaha qaar hir galaan hadii kalena ay ka badanayso sidaasi markay tahay dee waxaan qabaa in aanay hargeysi sidaasi ku sii jiri kari in loo yeedho maareeyaha biyaha oo la weydiiyo hargeysi xilliga ay biyo heli karto iyo mashaariicda aynu bilawgooda ogaanayno ee aan dhamaadka lahayn sidii mashruucii faanoole eela waday uun een dhamaanayn si uu xog inooga siiyo in loo yeedho ayaan soo jeedinayaa taasi waa ta biyaha.

Xaga nabadgelyada xukuumada waan ku bogaadinayaa xaga nabadgelyada aad iyo aad ayey ugu dedaashay arinkii bariga ee ceel afweyn waa la soo gebo-gabeeyey si wanaagsan iyo qaab wanaagsan ayaa loo galay waa uga mahad celinaynaa inkastoo la lahaa shaleyto ilaa xaleyto waxbaa ka soo noqdey wax weyn maaha laakiin qaabkaas waan uga mahad celinaynaa kan kale ee laascaanood isaga waxaan fileynaa in si wanaagsan loo galo.

Waxa iyadna jirta oo aan oo doonayaa in aan wax ka taabto arin aan xukuumaduna wax ka odhan si baaxad lehna aan looga hadal waxa waaye Somaliland xadbay leedahay taa mugdi kuma jiro waxa dhacdey arin aan hore udhicin ayaa 27 sanadood ka dhicin dalkeena madaxweyne puntland ah oo wasiiradiisa ku shiriya Somaliland gudaheeda waana markii ugu horeysay oo aan xukuumaduna dhawaaq ka soo saarin inaguna aynu raali ka nahay oo cid ka hadlay aanay jirin dee waa ayaan daro madaxweynaha puntland saddex cisho ayuu golaha wasiirada badhan ku shirinayey dee wax la qaadan karo oo loo dulqaadan karo maaha qarana waynu sheeganaynaa tukaraqna waxa inagaga dhintay laba boqol oo nin abdi welina badhan ayuu ku shirinayaa golaha wasiiradiisii dee laba arimood oo is qabta maaha waxaan leeyahay wasiirka gaashaandhiga iyo taliyaha ciidanka haloo yeedho oo siday usuurto gashay arinkaasi wax halaga weydiiyo ileen arin arin caqli gal ah maahee arimaha inta kale ee ragii iga horeeyey ka hadlay waan ku raacsanahay waanan uga mahad celinayaa sida saaxiibkay siciid usoo bandhigay dooda wanaagsan waana uga mahad celinayaa waanan ka baxay.

**Md. Xuseen Maxamed Cige** ***(2 min, 08 seconds)*****: -** shirgudoonka , xildhibaanada, saxaafada, shaqaalaha iyo marti sharafta kaleba way salaaman yihiin mudane gudoomiye waan ku

raacsanahay waxyaabo badan oo ay halkan mudanayaashu ka soo jeediyeen fikir badan oo aan qabayna hortay ayaa la yidhi anigu waxaan halkan ka soo jeedinayaa hal soo jeedin oo kaliya soo jeedin taas oo ah inagoo og mandaqada xaalada ka jirta inagoo og duruufaha inagu xeeran ee somaliya iyo xadadkeena ka jira inagoo ag colaadaha faraha badan ama colaadaha ka jira gudaha Somaliland inagoo og in dalku ubaahan yahay in go,aamo adag laga qaato duruufaha ku soo beegma.

Waxaan soo jeedinayaa inagoo sharci ahaan raacayna inuu golahan xal ka soo baxo odhanaya cidii talada dalka loo doortay cida aan ahayn ee wax dalkan ka soo hor jeeda ama nabadgalyadiisa wax udhimaya ama qarannimadiisa wax udhimaya loo igmanin in goluhu uu dawlada ku amro in xukuumadu talaabo sharciya ka qaado sida dadka ku baaqaya ee aan loo igmanin in shirar qaran ku baaqaya oo dalka lagu falqala laynayo anigu waxaan soo jeedinayaa in golaha xal ka soo baxo xukuumada ku amraya in xukuumadu talaabo ka qaado cid kasta oo ka hor imanaysa sharciga qaranka soo jeedintaydu intaas ayay ku kooban tahay.

**Md. Cabdiqaadir Jaamac Xaamud** *(5 min, 36 seconds)*: - shirgudoonka , mudanayaasha, saxaafada iyo marti sharafta kale waan salaamayaa runtii xaalada dalka marka laga hadlo weynu ognahay inay xaaladi jirto tusaale ahaan hadii aan soo qaato badhan oo kale xaaladeedii maalmihii dhaweyd waxaad mooda in dawladu hadyad u bixisay badhan oo wixii aasaasiga iyo dhaqaale iyo wixii lahayd dhan dawlad dhan baa timid meeshii oo qabsatey hal maalin kamay hadlin qaniinyo ayaa qaniinyo kaa fujisa may tagin maamul umay sameyn wax ala wax ay ka qabteen ma jirto taasina waa dhaawac Somaliland ku yaala oo aan waligeed ka dhamaanayn waxayna noqon doonta maamulkii maakhir in boodhka laga tumo waayo anagu ma doonayno in dalkayagu noqdo makhaayad kolba meel lagaga soo duulo taana anagaa taladeeda yeelan doona hadii dawladu wax ka qaban weydo.

waxaa jirtay dhaqaalaha dawlada waxaa ugu jirtay wax la yidhaahdo boqolkiiba laba oo mashaariicda gobolada bari ah markii xaaladasi timid waxey ahayd in degdeg loo baxo madaxweyne ku xigeenka ama wasiirada dhamaan inta la tago meesha oo laga jawaabo dareenka shacabka, shacabku ilaa hada wey ogol yihiin dalka iyo dadkuna waa Somaliland laakiin markay dawlad kale oo dhigaaga ahi meesha timaado oo aad ka jawaabi kari weydo waa nasiib daro taasi waa qodob.

Hadaan ka hadlo xaga sixir bararka bangiga tusaale ahaan waxay ahayd bangigu inuu hayo lacagta dollarka oo dhan inuu isagu maamulo ama dibad haka yimaadeen ama gudaha haka yimaadeen markaa waa la xakameyn karaa doolarka, ta kale ee xisbiyada ee maalmahan ay xisbiyadu ay ka hadlayeen, xisbiyadu waxa waaye xisbiyo qaran runtii laakiin in dalka loo tudho oo dhalinyaradaa jaamacadaha ka qalin jabinaysa maalin kaska niyad jabin marka muranku tiro dee taasi ma fiicnaanayso dalkana in loo tudho waa mihiim oo waxa weeye maadaama Somaliland halkaa waxay ku soo gaadhay is qancin, isku tanaasul mar walba khilaafku waa soconaayey intii Somaliland jirtay laakiin mar

walba waa la daboolayey oo waa la is qancinayey taana in la is qanciyaa waa muhiim xisbiyaduna waa inay wadanka ka saaraan oo shir beeleed laga gudbay keenaan meesha ma taalo in la isku soo dhawaado oo miiska wada hadalka la iskugu yimaado ayaa muhiim ah.

Tan kale ee xaalada ka taagan gobolada bariga dee sidaas kuma samaaneyso dawladu talaabo qaadi weydo waxey noqonaysaa talaabo kale beeshu isku tashato oo ay qaado runtii waxaan ku soo ururinayaa dawladu talaabo ha qaado maamul daadajin ha sameyso puntland waxeynu ku tartami jirnay dawladihii hore tusaale ahaan dawladii Maxamed H. Ibraahim Cigaal waxaan xasuusta kala dhacbuu yaaley kastamku halkaasa lacagta Somaliland lagu qabanayey dawlada Somaliland iyo puntand way kala horeeyeen oo sideed sano ayeynu ka horeynay waxey ahayd intaanay waxani iman inaynu maamulkena si fiican ukasbano hadana marbaa jirtay maamulkii la isku ururiyey oo meeshiiba laga soo rarey khaladaad aynu galney ayey ahayd si kastaba ha ahaatee mnanta talaabo weynu qaadi karnaa waxna waynu kasban karnaa inagoon qori qaadan ayaynu maamul daadajin sameyn karnaa maamulkii daadajin karnaa dadkii kasban karnaa dhaqaalihii iyo haykalkii geyn karnaa fadhi ka sameyn karnaa sida ay yidhaahdeen halkaasanu fadhi ka sameynanaa dhako ayeynu keeni karnaa laakiin hadaynu aamusno shacabku ma aamusayo talaabana way qaadi doonaan haday dawladu talaabo qaadi weydo wa bilaahi tawfiiq.

**Md. Maxamed Cismaan Bulqaas** *(5 min, 18 seconds)*: **- Bismilaahi** Raxmaani Raxiim, Waan salaamayaa Xildhibaanada, Saxaafada iyo Bulshada kale ee joogtaba Golaha Aniga waxaa i khuseeya inaan ka hadlo xaalada bariga Sanaag wadankii inuu kala goay oo bariga sanaag uu iska tegay.

Oo gacmo kale ku jiro waynu ognahay oo cidkalena loo sheegi mayo sidaynu la socono beryahan danbe waxaa ka jira degaanada bariga Sanaag waynu la soconaaa Maamulka aynu jaarka nahay ee Puntlandbaa runtii gacanta ku haya.

Oo wax qabad la arki karo ka sameeyay Mashaariic ka qabtay dadka soo jiitay dadka waxtaray Mashaariic badan oo ay ka mid yihiin Jaamacado, Laamiyo, Ceelal la qodo, Dhaamam, Eeribooda la sameeyo wax allaale wixii baahiyaada ee meesha ka jira waa ay wadaan.

Illaa hadana waa ay wadaan Markaa Xukuumada Somaliland iyo Baarlamaanka waxaan leeyahay, war arimahaasaa taagane wax halaga qabto. Hadii kale Wadanku wuu iska kala tagayaa dhawaan inyar baa u hadhay intii wadada ceergaabo imanayso. Intayada halkan joogtaana dee waanu iska tegaynaa hadii alle yiraahdo hadii kalena ayaamo ayaanu filimada iska daadaawan doonaayoo ayaamo iska sii joog joogi doonaa meelahan.

Sidaa darteed waxaa halkaas ka cad in Maamulka Somaliland uu ka kaaftoomay Degaanada Bariga Sanaag ee aan Xildhibaanka ka ahay. Degaanadaydiina iyana waa ay

ka kaaftoomeenoo waa ay fogaadeen oo Puntland ayay ka tirsan yihiinoo Somalia ayay taageersan yihiin waxaasoo dhanbaa jira.

Waxyaabahaasoo dhan waa waxyaabo aynu dayacnay oo ay Xukuumada ay dayacday, Anigu ka xildhibaan ahaan mudo 10Sano ku dhaw intaabaa waanka hadlayay miidhiyaha meelkasta idinkaa ka markhaantiya oo aan lahaa dadka wax haloo qabto xukuumadihii hore iyo tanba wax loo qabtayna haba yaraatee ma jirto waxaan ka hadlayayna caynkaasay ahayd waxaa laga dooni doonaa Circa waa halkii MaahMaahdii bay maraysaa (Illaahay ha u naxariistee) Gaariye ee ahayd ayaanbaa iman doonta ( Dharaar ***baa iman doonta***- dadka Sool iyo Awdal ee- Aadanow hagrateen – raacdadoodu Fogaato).

Hadaan xukuumadan iyo Baarlamaankani waxba ka qaban oo Arrimahaa iyaga ah la sixin oo aan maamulkii la fidin Mashaariic meesha la geyn oo saami qaybsi lamayn. Oo dadku xukuumada wixii ay ku layaaheen meesha la keenin oo shaqaalihii la keenin oo adeero meesha waxba ma jiraane intaynu ka sheekaynayno doorashooyin iyo komishanka hala eryo iyo la eryi maayo Wadankiiba wuu kala tegay waa uu kala socdaa.

Wadankiiba badhbaa maqan markaa waxaas oo dahn waxaa ka culus inta beelaha dhexe ay isku meeraysanayaan oo ay leeyihiin ani ii kordhi iyo ani ii kordhi wadankiiba wuu iska tegay.

Dhinacaa kale ee Soolna waxa ka taagan waynu la soconaa oo puntland iyana faraha ayay inagu soo haysaa.

Culays badan ayay xukuumada saartay halkaas taas markaa iyadunna waa ay ku mahad santahay halkaas laakiin xaga sanaag waa ay dayacday waxay ka qabatayna ma jirto waxaan markaa oo aan soo jeedinayaa.

In sida ugu dhakhsiyaha badan looga qabto degaanadaa oo gurmad lala gaadho oo xukuumada ah baarlamaanka laftiisu waa inay ka hadlaan oo maaha inay iska daawadaan intii wadanku inagu dumi lahaa oo iskaga kala yaaci lahayn dee wax halaga qabto markaa waxaan leeyahay dhulkii waxba mayaalaanoo oo dadkii manta waxba uma yaalaane qolyahayaga degaanada kasoo jeeda war meesha mayskaga tagnaa mise meesha ayaamo masii joogjoognaa aynu iska daawanee kolba maalin dhaway goaamo ayaa naga soo bixi doonee iska dhegaysta waanka baxay.

**Md. faarax maxamuud Cabdille** *(17 min, 05 seconds)***: -** asalaama calaylkum Waraxma Tulaahi, marka ugu horaysa waxan ku bilaabayaa anigu horta Gole ahaan waa in anaynu inagu si ay xukuumadeena ugu ilaalino, waa inaynu inagu horta waajib keena Dastuuriga ah ee aynu qaranka u hayno waa inaynu inagu ka soo baxnaa Gole ahaan baan soo jeedinayaa, wax yaabo badan ayaa inaga lafteena inaga dhiman, waxa ka mida inaynu si toosa xukuumada ula xisaab tamin, inagoo siyaasiyan deegaanadii la inaga soo

doortaay iyo gobaladii aynaan ka shaqayn, waa kuwan xildhibaanadu ka hadlaaya xaga bariga, siyaasigaa laga soo doortay deegaankaa weeye waajibkiisa siyaasiga ah ayay ka mid tahay, inuu ka soo shaqeeyo gobaladiisa iyo dalkiisa xukuumadana waa inay dhagaysato wixii talo ee uu keeno, hadii la dhagaysan waayo waa in aynu hadalno oo golaha horkeeno wixii qaranka u dana ee maamul gaadhsiinta, wax ka qabashada xildhibaanku xaqbuu u lee yahay inuu ka hadlo.

Waxaa waajiba inaga lafteenu gole ahaan inaynu ka shaqayno wixii qarankan aynu ku taageerayno, oo gobal walba xil inaga saran yahay, isku sina uga hadlayno, waxa waaye siyaasiga laga soo doorto gobalada dalka hadii uu war bixin keeno oo ay muhiim tahay, oo ay dalka u dan tahay waa in aynu inagu ku tageerno xukuumaduna waa inay ku tageerto waan soo jeedinayaa (seconded).

Waxaan doonaya anigu inaan in yar is dul taago horta xisbiyada waa run dhaliil bay leeyihiin, sida golaheenu dhaliisha u leenahay, ee xukuumadu dhaliil u leedahay baa xisbiyaduna u lee yihiin. maxaa yeelay hada arimaha doorashooyin kee la isku hayo, wax way ka hadli karaan, waxna kama hadli karaaan, sharcigu cid buu siinayaa iyagu soo jeedin bay leeyihiin, madaxwaynuhu dee komishanka ma kala diri karo, xisbiyaduna ma kala diri karaan sharci bay ku fadhiyaan mudo 5sano ah ayaa la doortay, eedayn baa loo baahan yahay, mana aha inuu isku qabto.

shir beeleed baa la qabanayaa dee gudoomiye xisbi kuma dhawaaqi karo waa khalad weeye, kuma dhawaaqi karo mana soo jeedin karo waxaanan qabaa inay dambi tahay. Taa waxaan leehay dhaliishaasi waa dhaliil jirta, waxaanan u soo jeedinaynaa inay sharciga u hogaansamaan, waxa waaye wuu mahadsanyahay gudoomiyuhu, waxa waaye markii uu xisbiga kale ee Ucid soo jeedinayay gudoomiyuhuna waxa uu yidhi waanu taageer sanahay tii uu ku dhawaaqay gudoomiye faysal, marka waxaa waaye dee labaduba waa ay ku dhawaaqeen taa waxaan leeyahay xaq uma laha. Waxana ka horaysa golahan marka la leeyahay sharci daruu ku fadhiyaa, kuma fadhiyo marka gole danbe la soo doorto ayuu banaynayaa intaa kale golahan ayaa sharciya. Lakiin waxa waaye xisbiyadu waxa ay jabiyeen oo uu kulmiyana ka mid yahay, qaabkii ay udhisnaayeen oo qabyaaladaystay, bay xisbiyadu marayaan sidaa ay imika yihiina waxaaynu qabnaa inaan doorashaba lagu qaban Karin, anaga xaq baa la noogu lee yahay in badan baynu fadhinay inaynu banayno oo doorasho la qabto wadanka ayay dan u tahay. Lakiin waxaa waaye xisbiyadani ma yihiin kuwii inaga saari lahaa, waxaan qabaa inayna ahayn anigu saddexdaba waan isku darayaa taana waa taa.

Dhawr arimood baan anigu xukuumada u soo jeedinayaa, marka hore waxan qabaa in la dhegaysto oo la fuliyo xukuumadu iyadaa gashay heshiiskii khaatumo waan qabaa, waana ku taageerayaa xildhibaankii soo jeediyay waayo heshiis buu ahaa waa lagalay waa in la fuliyo.

Waxan kaloo soo jeedinayaa warbixintii halkan guddida joogtada ahi inaga siisay, waxa ay inoo cadeeyeen ama ay inaguba ognahay, dekadii dee mar walba dhagax baa la dhigayaa ilaa hada wax laga qabtay ma jirto, mudo badan ba heshiiskaasi waa jiray in mudo hore la bilaabo ayuu ahaa, DP WORLD mudo badan ayay iska maalaysay waxaan xukuumada u soo jeedinaynaa in heshiiskii lagu daro dekadii in la bilaabo, wakhtigu waa is gurayaa in dakada lacagtii ka soo bixi lahayd uun lagu dhisaayo, inay maal gashato buu heshiisku ahaa taa waxaan leehay in deg-deg loo bilaa baa oo heshiiskii la dabaqaa.

Waxa kale oo aan xukuumada u soo jeedinayaa warshadii sibidhka dad ganacsata ah ayaa la iska siiyay, dad shiciba ayaa la siiyay, sidii haamihiiba loo soo celiyay, madaxwaynaha iyo xukuumadiisaba waxan ugu baaqaynaa in warshadii sibidhka la kiciyo, la soo celiyo cidna aan la siin, waanu soo jeedinaynaa.

Arimaha nabad galyada hadaan eego xukuumadu si wanaagsan ayay uga shaqaysay, arinkii ceel afwayn iyo soolba, arimaha coolaadaha reeraha walaalaha ee isku dhacay, way ka shaqaysay anigu fikirka ah waa la hagraday waa la isku dirayaa waxaa ma aamin sani, siwanaagsan oo wanaagsan baa looga shaqeeyay. Lakiin waxa muhiima oo aan xukuumada ku dhaliilayaa waxa waaye, hadii wax la gaadho waxa in la xakameeyo, fulintooda iyo cida jabisayba in talaabo laga qaado, oo waxaa waaye aan la sugine, 2bilood ayaa loo qabtay, 2bilood imika 3bilood iyo maalmo ayay maraysaa, waxa ay ahayd in mar walba madax dhaqameed kii iyo odayaashii xidhaha ahaa in dhamaantoodba lagu daba taagnaado, saacad walba in iminka xagii bay taala. Ta soolna iyo ta sanaagba inay xukuumadu ku daba gasho dadkii ay u igmatay.

Waxaan doonayaa inaan ka hadlo arinta degaanka oo qodobo ayuu yara dhaafay Siciid, laakiin waxaan ognahay in gobalka saraar wax alle wixii dhir ahaa, waa la shiday dhuxul baa laga dhigay, dhuxushaasina waxay ka dhooftaa boosaaso, waxa aan lee nahay xukuumadu iyo gobalku wax ha ka qabtaan, markaan wareysanaynay gobalkaa iyo sababta wax looga qaban kari waayay, waxaay noqotay ta policeka iyo ciidanka iyo maamulku, inayna awoodin sababihii ay wax kaga qaban la haayeen, haday noqoto gadiid, dhaqaale, arimahaa ay u awoodi wayeen, ciidanku na uu yar yahay police ku, waxaanu leenahay wax halkaa ku jira dhaqaale baaba, maaha waxa uu dadku shidanayay, waa baayac mushtar, waxaa la rarayaa Doonyo iska dhan, arintaa waxaan u soo jeedinaynaa inay xukuumadu wax ka qabato oo gobalka in lagu taageero.

Waxaa kaloo laba wasaaradood oo wasaarada beeraha oo runtii waxaan qabaa in ay hawlo balaadhan qabatay, in wax soo saarkii uu muuqday aad iyo aad baan ugu bogaadinayaa. Wasaarada waxbarashada iyo haayada shaqaalaha oo wada socdaana, waxay istaageen school kasta oo wadanka ka jira hala dhigto ama yaan la dhigan, waxaan ka codsanaynaa ama doonaynaa sidaa soo kale, ama ay soo taabtaan iyaguna si ay u helaan dadkan shaqaalaha, maxay meel waliba u baahan tahay, meesheebaa u baahan in

wax laga qabto, meeshee baa hawlaheedu udhamaystiran yihiin taana waan soo jeedinayaa.

Wasaarada macdanta macdanta waxaa lagu hayaa xaalufin, sida dhirta loogu hayo oo kale waaye, qof walba xaguu doonuu ka galayaa, waxaan u soo jeedinaynaa xukuumada, macdantaa iyo khayraadka wadanka iyadaa ka masuula, waa inay iyadu sahamisaa, hadii ay qodis u baahan tahay iyadu qodaa, hadii iyadu la iib gaynaayo iyadu iib gaysaa, maaha dad kale in gacanta loo galinaayo ama dad ganacsata ah loo gali karo, macdanteenu maaha, waa la isku dili karaa, qabaail baa ka abuurmi karo, marka dadkaa wax yaree aan macnaha lahayn isku dilaya ayaan nahay oo waan isku dili karna macdanta, waxaan leeyahay xukuumadu iyadaa ka masuula iyadaa dad waynuhu wakiishay, waxaan leeyahay shirkadna yaan loo xidhin buur oo an la odhan buurtaa adaa iska leh, waa in dawladu iyadu tidhaahdaa halkan wax ma ku jiraan, oo ay iyadu iib gaysaa oo dad shacaba gacanta loo galin, meesha dad baa degan iyada dad kaasi waa ay is qabsan doonaan, waxaa kala abuurmi doona, sida aan hore uga hadlay haamihii iyo sibidhkii bay buurtuba la mid tahay, dawladana dadkaa igmaday waxaan leeyahay yaana shirkada gacanta loo galin.

Inta aan ku daraayo ee aan ku soo gabgabaynayaa waxaa waaye. Gobalka saaxil wuu ka duruufo duwan yahay gobalada kale, waa gobal xeeba waa gobal ay wadooyin kiisu xidhan yihiin, waxa kale oo waaye waa gobalka uu dhaqaalaha ugu badani ka soo galo miisaaniyada, waxan soo jeedinayaa in xukuumadu, ay wasaarad walba oo ka tirsan ay gobaladu u sinaa daan oo ay gobal walba ku tagto kormeer, ilaa hada xukuumada intuu madax waynuhu gacanta ku qabtay hada jooga, ama wasiirada la soo magacaabay mid ka midihina kuma tagin gobalada fog fog ee duruufuhu ka jiraan, ee u baahan wadooyinka, ee u baahan in xoolaha la xanaaneeyo, ama beeraha ee biyaha leh, ee u baahan khayraadka leh , ee u bahan in laga fuliyo ilaa hada wasiir kaliya oo tagayna ma jiro;Tusaale dagmooyinka laas ciidle iyo xagal, ilaa hada xukuumadu waxa ay jirtay sanad ilaa hada sanadkaa hal wasiir oo booqday ma jiro, ka maaliyada wax baa uga banan, ka xanaanada xoolaha wax baa uga banaan, ka beeraha wax baa uga banaan, ka gaadiidka iyo wadooyinka wax baa uga banaan, mid walba waxbaa uga banaan.

Marka ay wasaarada walba samaynayso miisaaniyada, dee mid walba xagay wax uga soo baxayeen waa inuu ka war hayaa. Oo miisaaniyada dalka lagu sameeyo sida ay xaga dalka u kala liito, sida meel walba waxa ay u baahan tahay taasi waxa aan leehay ma dhicin, waxaanu leenahay cadaalad baan u baahanahay, waxa nu u dhaaranay inaad sinaan iyo cadaalad ku maamulaynaa, waa inaynu eegnaa waxa uu gobal walba u baahan yahay, inaga lafteenu waa in aan war isku haynaa, tusaale imika aniga hadii la iga soo doortay saaxil, waa in boorame ka war hayaa, oo aan sool ka war hayaa, si aan inagu ugu salayno ddoda heena iyo dhaqaala heenu aan ku salaynaa. Waxaana ku soo ururinayaa waxa waaye xildhibaanada gobalada bari ka soo jeeda waxan xuukumada u

soo jedinayaa iany dhagaysato, talooyin kooda ka dhagaysato, wixii ay xaq u leeyihiin la amriyo Ayaan soo jeedinayaa.

**Md. Cabdirahmaan Yuusuf Cartan** *(13 min, 36 seconds)*: **-** shirgudoonka iyo xildhibaanada sharafta leh ee adkaysanaya waan salaamaya, xaalada dalka hadii aynu ka warano, labaan ukala qaybinayaa gudoomiye, mida arimaha gudaha waad arkaysaanoo dhinaatooyin ayaa bilab maaya , ceel afwayn ama dhumey ha ahaato, dadaal badan ayaa la galiyay tacab badan ayaa lagu bixiyay, lama odhan karo wax garad iyo xukuumaduba way ka kaabisay iyo asxaabtuba, intuba way isku dayeen wayna jecel yihiin, in dhibaatooyin kaasi ay istaagaan, lakiin dhibaatooyinkii ma tagna way socdaan waliba dar dar ayay sii qaadanayaan, halkii la islahaa way dameeno la islahaa waa la qanciyay dadkii dar dar bay sii qaadayaan.

aniga waxay ila tahay minin ka dushii sii Ayaan dhayaynaa, waxa ay ila tahay inaynaa waxaa sababaya dhibaatadaa, ka kaarka qaadanaaya ee waynaanaya, waxa jira cawaaqib ama mushaa kil u sababa, mashaalkisaa u sababa ayaana nigu eeda dusha ka saarayaa, dhibi way dhici jirtay waligeed ba, oo soomaalidu waa ay isku dhici jireen waligoodba, lakiin hadana waa ay iska dhamaan jirtay uun, lakiin dagaaladan imika ee dhamaan la , waxa waaye wadanka arimo amaan kiisa dhibaato ku ah ayaa jira, oo dagaaladaa u Soboba, oo dhibaatooyin badan oo kale u sababa anigu waxan u aanaynayaa bal wadaha ama daroogada xad dhafka ah ee dal keena soo gasha, ee uu jaadku kaw ka yahay,oo khamrigii soo raacay oo xashiishadii soo raacdayoo intay magaaladii soo dhaaftay miyigii tagtay.

Oo wadanka oo dhan isku martay, marka ay dadkaadu bal wada bataan macnaheedu waxay tahay, baahidoodii ayaa badanayso, baahidoodu markay badato waa lagaa faaidaysan karayaa ba cidii dank a lihiba, ay istcimaasha dadkaa, dhul aan waligii jaad gaadhin jirin oo gubana ayuu gaadhay, waxa uu gaadhay hada meelo uuna waligii gaadhin, dhaqaale bur burna waa inagu hayaa, deegaan bur bur buu inagu hayaa, oo dhuxushan imika la lee yahay waa la shidayaa oo boosaasa loo dirayaa, dad reer boosihi xagan ma yimaadaan, adhi jirkii dadkii deegaanka ahaa, ee dhulka lahaa ee dhulka xooluhu u daaqayeen ayaa dhulkii gubaayo oo jaraaya, sababta ay u jarayaan maaha in ay cunto ku soo iib sanayaan, ee daroogay ku iibsanayaan, ninku hadii uu qadhaadhoonayo, oo qori uu sito hadii cidi u dhiibto wax ee tidhaahda hawsha inoo wad uu wadayaa waaye, markaa waxa waaye inta aan sidaa u daroogaysanahay, oo shicib keenii iyo dhalin yarteenii ay daroogaysan tahay, nabadeenu waxa waaye xaasil noqon mayso, dalkeenuna nabad ahaan maayo degaankeenuna bd baadi maayo, waa ogaydeen reer miyigii odaygii ayaa ka xadaaaya hashii ama laxdii ama wankii islaanta, waxaasi waxa waaye jaad doonis.

Marka jaadku waxa uu inagu hayaa nabad galyo xumo,caafimaad xumo, dhaqaale bur bur buu inagu hayaa, xoolaheenii iyo tacabkeenii inuu Ethiopia gala ayuu inagu

hayaa,hadii ay xoolaha uun inoogu jodo waxaba ma ahaateen, lakiin nabad deenii ayuu halis galiyay, maarkaa madaama aan jaadku meesha uun ka soo galo aan naqaano, khamriguna messha uu ka soo galo aan naqaano, oo wax inoo baxa uu ahayn, baarlamankuu xil ka saran yahay oo golaheena ayuu xil ka saran yahay, xukuumada ayuu xil ka saran yahay, xukuumada qaranka ayuu xil ka saran yahay, sidii hawshaa looga hawl gali lahaa.

Waxa waaye malaayiin lacaga ayaa inaga baxaysa dhulkeenuna waa bur burayaa, dadkeenuna waa baaba ayaa nabadeenuna waa bur buraysaa, jiritaan keeni ayay halis ku jira oo ay halis ku hayaan wax yaabahaa khatar ta ah ee inagu socda, dalalka ndariska aan nahay sitoosa oo badheedha ay u dhiiri galiyaan, hadii aad Ethiopia u dhiiri galisa sida dal aan daris nahay, somalilalnad maamul keeda iyo shicib keeda iyo baar lamankedu marna kalama hadlin inay dibin daab yada ka dayaan. Haday nu nahay golihii dadka wakilada ka ahaa hawshasi waa hawl cidna aan lagu eegi karayn, hawshaa inaan wax ka qabano oo maska madaxaa laga dilaaye, aynu maal keena iyo amaan daradeena aynu madax ka dil no oo aynu ka hawl galno, waxa waaye hawl inoo taala waaye, hawl xukuumada u taala waaye, hawl xisbiyada qaranka u taala weeyaan, wali xisbi qaran ha noqdo mid xaakima ama mid mucaarida ha noqdee mid siyaasad ka lihi arintaa ma jirto.

Oo ku hawl galiyo Mucaaridka waan durayaayoo waayo xil gaara ayay hayaan, maanta hadii la waayo xisbi mucaarida oo wax ku oola, oo ay dadkii ay ku dabada faylaan, waxaa dhacaysa in qabaailku ay mucaarid noqdaanoo oo ay iyagu baahiya hooga ka hadlaan, hadii la waayo baar laman dadkii u hadlaayo oo baahidoodii sheegaaya, dadku iyagaa hadlayo oo jid khalada wax marinaayo.

Maarka waxa nu u baahanahay hadii ay baarlaman noqono mid hawshiisii qabsado, hadii aynu mucaarid nahay uu mucaaridku hawshiisii qabsado,oo ay hawlaha halista inagu haya ay ka soo hadlaan, oo ay dadka qorshayaal u keenaan ama xukuumadu ha qaadato ama yayna qaadan, waajib koodii ha qabsadaan markaa Ayaan ana raacayaa, waxan lee hay hawshaa waar maska madax an ka dilno, waar walee inayna ceel afwayn nabadi ka dhacayne inta ay dadka miyigaa dagani ay sakhraasan yihin, ama ay mirqaasan yihiin qoryana sitaan suuro gal noqon mayso.

Waxa isku yimid soomaali oo dhan putland kilinka 5aad, wax alle wax ay ka qaban karaan ma jirto,waano iyo waxooga uun inay sheegan mooyaane dhibtii taalay miyay wax ka qabanayaan, dadkaasi waxba iskuma haystaan, dadka dhibta gaadhay maanta ceel afwayn geel ma kala haystaan dhul ma kala haystaan, wax maanta isku diroo oo ay kala samri waayaan majiraan lakiin dad aan caadi ahayn, dadka aan caadi ahayn aynu ka saarno oo hadii waliba baarlamankii nahay, gudoomiye iyo xildhibaano qorshihii aynu hawshaa kaalinteeda ka qaadan lahayn,

Arimaha dibadda waan ku raacsanahay xildhibaanadi ka hadlay arimaha dibada, isbadal wayn baa ka socda, waxad moodaa qaabka aan u dhaq mayno inaynu isbad kaasi ina khusayn, waa ina saamaynayaa badalkaasi aad iyo aad buu inoo saameeyaa, waxa waaye isbadalkaa gobalka ka dhacaya inaynu la socno oo aan la jaan qaadno, oo waxaynu ka yeelayno aynu yeelno weeyaan, baarlamanku kaalin buu ku lee yahay oo waa inaynu kaalin teen aka qaadano waaye, oo xildhibaanadu ay qorshe samaystaan sidii aynu xeerar u soo sarin uun mahee, sidii ay xildhibaanadu ay ula xidhiidhi lahaayeen baarlamanada kale ay ula xidhiidhi lahaayeen oo waxa aynu qabanayno, oo aynu dareen siin lahayn inay nabadeenu iyo nabadoodu isku xidhan tahay, oo ayna ahayn inaan inaga oo qudha aan u baahanahay nabada ee ay iyaguna u baahan yihiin aynu dareen siino.

Waxa kaloo jirta arimaheena dibada wali waxa aan ku xidhan nahay UN TII qaramada midoobay, waxaynu ku xidhan nahay EUdii, oo qaramada midoobay iyo EU waxa ay dhisaan oo kool koolinayaan oo ay naaxinayaan oo ay dawlad nimo gaadhsiinayaan oo ay hawadeena ku wareejinayaan oo code keeni ay ku wareejinayaan dawlada soomaaliya, inaguna sidii gabadh edab leh Ayaan markii ay iyagu yimaadaan aan u faraxaynaa oo aan lee nahay wlhi ku waasi waa UN, waxa waaye sidaa isbadalku u socdo bariga Africa ayaa caalamka kalana isbadalku u socdaa, hadii UN tu inoo baahnayn 27sano ayay nu sugaynay oo EU DU waxba inala diyaar ahayn oo ayna inala qaban, waa inaynu optionkeena aynu baadhanaayoo,oo meeshii ay hawla heenu ka hirgalayaan baa an tagi karnaa, cidna uma xidhnin cidii aynu ku xidhnayn ee aynu dhawraynay, waa eu iyo England iyo UNta, kuwaasina waxa ay marayaan siyaasad cad oo ah anagu dawlada way nee soomaaliya ayay nu dhisaynaa, taa markay ini bur burin waydo lakiin si tartiiba ayaa la inooga riixayaa,

waa inaynu option samaysanaa ayna UN-tu diyaarna la ahayn inay wax la qabato, oo ictiraaf keena iyo nabad gal-yadeena ay ididaalo ku noqoto, eudu ku noqoto england ku noqoyo, oo caalamkii waa aynu nidhaahno yaa soomaaliland wax la qabanaayo, yaa soomaaliland wax la ogol oo caalam koo dhan aan ku nidhaahno waaye, oo cidii inala diyaara ee aan isku dan noqono, nin aynaad isku dan ahayn maxaad marti ugu noqonaysaa. Nin aynaan isku dan ahayn oo dan kale wata maxan isku dan u noqonaynaa, oo cid kale uun dhisaayo maxaad ugu noqonaysaa dee waa waxba dee. Markaa waxa ay ila tahay taana xisbiyada iyo baarlamanka, anigu xukuumada iyada oo qudha maaha qaranku, dawladu baarlamaan bay tahay oo bulshada rayid ka ah baa jirta, oo qolooyin kale oo badan ayaa jira oo aad u fir fircoon, waxan nu u baahanahay inaan arimahaa odhan aan dhaq dhaqaajino, arimahaasoo dhan maanta hadii ay nu sidaa u sii fadhino god keena ayay biyo inoogu soo galayaan, inaan fadhiga ka kacnaa u baahanahay, baarlamankana inaynu qorshe yaashii hadii aynu dhaqaale u hayn inaan ku darsanaan u baahanahay, inaynu saafara baxa iyo gudiyaal baxa qorshayaal lagu daraan u baahanahay.

**Doodda Xog ogaal u-noqoshada Xaalada Dalka Maalinta 2aad**

**Gudoomiyaha: -** Mudanayaal Waxaa inoo soconaysa dooddii Xog ogaal u-noqoshada Xaalada dalka, Xildhibaanku markuu hadlayo ha loo daayo hadalkiisa oo yaan laga dhexgalin, waxaan ku soo dhowaynayaa Xildhibaan Xasan Xuseen Shide.

**Md. Xasan Xuseen Shide** ***(04 min, 23 seconds)*****: -** Bismilaahi, Shir-gudoonka, Xildhibaanada iyo bahda saxaafadaba dhamaantiin waxaan idinku salaamayaa Salaanta Islaamka ASC, Salaan ka dib. Saddex qodob baan anigu ka hadlayaa, waxaana ugu horeysiinayaa **Dagaalkii sokeeye ee Ceel-afweyn** dawladu si mug leh ayay uga hawlgashay soo af-jarida colaadaas sokeeye intii taagteeda ahaydna way dedaashay, laakiin waxyaabo yar yar oo la moodo inay ka gaabisay way jiraan, iminka maalintii dhowayd ee Xuska Ciidanka Bilayska wuxuu Madaxweynuhu ka dhawaajiyay in la soo marti sharafta ka kala imanaya dhulka soomalidu degto oo dhan kuwaas gurmad u ah inay so oaf-jaraan colaadaas Sool, waana inaynu si qiimo leh u soo dhowaynaa martidaas, illaahay idamkiina hawshaas way inaga dhamaan doonto, intii ku dhimatay rabi ha u naxariisto, intii ku dhaawacan tahayna rabi ha caafiyo, dawladana waxaan ku boorinayaa inay sii dar-dar galiso, wafti Madax-dhaqameed iyo Guurti Wasiirka Daakhligu wato ayaa loo dirayaa markaa anigu waxaan odhan lahaa Golaha Wakiilada qaar ha lagu daro oo yaan loo kala hadhin.

Arrinta labaadna waa ee aan ka hadlayaa waa **Badbaadadda waddooyinka,** waxaa sanad walba dhaca intii dalka la soo galay intaas oo qof oo boqolaal gaadhaya inay ku dhintaan shil baabuur sanadkiiba, isla markaana hanti farabadan oo baabuur iyo xoolo ah, sababta ugu weyn ee waxaa sababaysaana waa dareewal xumo iyo iyadoo aan liisamada oo la hubin aan imtixaan adagna laga qaadin, tayada baabuurta oo aan la eegin iyo waliba waxaan dambiga sii saarayaa baabuurtii oo wada gurano hadana haadkii midigta maraya, taas anigu waxaan soo jeedin lahaa baabuurtu waxay u badan tahay kuwaas guran sidaas darteed dalal badan baa mara bidixde in haadka bidixda loo wareejiyo, wax infrastructure inoo sameysnaa oo inaga khasaaraya sida ishaarooyina ma jiraane halkan bidixda aynu marno, waayo waxay badbaadinaysaa buskan dhinicii waddada wax ku rogaya iyo dareewalkan dhinaca kale wax ka soo eegaya iyo waxyaabo badan.

Markaa maaha inaynu daawano sanad walba oo inagay umadu inoo igmatay oo xeer-dejine waa inaynu sharci ka soo saarno oo waliba anigu waxaan odhan lahaa haadkaas Bidixda ha loo badalo.

Arrinta saddexaad, waxaa baryahan caado noqotay **cuqaal, odayaal iyo madax-dhaqameed Tvga** soo fadhiisanaya oo hanjabaya ama reero kale u hanjabaya ama dawladaba u hanjabaya, waxaas hadii lagu waddana waxay keenaysaa kala fogaan iyo colaadda qabyaalada oo sii fogaata, Tvyadan intay wax yar qaataan dabadeedna soo

daynaya wax kastaba waa in iyagana xakamayn loo sameeyaa qof kasta oo dhiilo iyo waxyaabahaas dadka isku diraya ka hadlana wax ha laga qabto, hana laga soo saaro xeer wax laga qabto arrimahaas, anigu intaasaan ku soo koobayaa. WSC.

**Md. Maxamed Jaamac Cabd** *(29 min, 01 seconds)*: **-** Shir-gudoonka, Mudanyaasha iyo Saxaafada aad baan u wada salaamayaa, waxaa inoo bilaabantay dood qiimayna oo dalkeena ku qiimaynayno, dooddaas waxaan jeclahay qasdigeenu yahay inaynaan ka eegin irbad daloolkeede si furan oo wax toosin ah oo macno leh inaynu u qiimayno.

Qiimaynta waxaan ka bilaabayaa halkii awowgay wuu maqan yahay jirde ka bilaabay ee ahayd **arrimaha Dibada**, ararimaha dibada markaynu qiimayno iyo dalkeena wuxuu dalkeenu ku xidhan yahay oo aynu wax la wadaagaa mandaqadan aynu ku noolnahay ee geeska afrika, mandaqadana waxaa ka dhacay isbadal aad u waaweyn sanadihii dambe, isbadalkaasi saamyn aad u wayn buu inagu leeyahay sida dal walba oo geeska ah ugu yeeshay, dalalkii IGAD baa heshiiyay oo Itoobiya iyo Somaliya ka mi tahay waxayna gaadheen heshiis, Heshiiskaas ay gaadheen ilaa iminka la qabsigiisu wuu adag yahay habkii aynu ugu xidhnayn ee aynu Itoobiya saaxiibka ku ahayn iyo qaabkii loo saaxiibka ahaa wax weyn baa iska badalay.

Sababtoo ah, waxay dalalkaasi ku heshiisyeen Somaaliya oo iminka madaxa la soo kacday oo dawlad la aqoonsan yahay yeelatay waxyaabahay ku gor-gortamaysa waxa weeye Somaliland iyo Goboladii kale ee iyada federaalkeeda ahaa in Itoobiya iyo dalalka kale ee Geeska Afrika aanay ula macaamilin sidii hore ee iyada loo maro oo cidii albaabkaas garaacda noqoto mid khaldan, waxaa lagu heshiiyay in la isu baadi celiyo wixii mucaarad ahaa iyo wixii aanay raali ka ahayn, inaga iyo Itoobiya runtii macaamil wanaagsan baa inaga dhexeeye laakiin habkii heerka sare ahaa ee aynu isugu xidhnayn waxaad moodaa inay wax iska badaleen, isbadalkaasina saameyntiisa iyo qiimayntiisa ayuu leeyahay, games iyo qaabkii loo ciyaari jirayna laftoodu way is-badaleen sida muuqata si wanaagsan oo wali la odhan karo wax nool weeye ayay Wasaaradeena Arrimaha Dibada isugu xidhanyihiin inkasto aanay wali dhicin kulamadii madaxda heer Madaxweyne ahaa ee dhici jiray iyaduna wakhtigeeda ayay leedahay oo taasi waa wax mandaqada lagu qiimayn karo oo la leeyahay waa wax mandaqada ku cusub.

Dhinaca kale, Talaabooyin waaweyn bay qaaday Arrimaha Didabadu markaan qiimeeyo sababtoo ah waa baryahan muuqanayay xafiisyo waaweyn oo laga sameeyay Wadamo Geeska Afrika ah oo Kiinya ka mid tahay shaqaynaya oo fir-fircoon isla markaana aad iyo aad u muuqda markaa waxaa la odhan karaa waa talaabo hore loo qaaday oo muuqaata, runtii waxyaabaha la odhan karo arrimaha dibada talaabo wayn bay ka qaadanayaan waxaa ka mid ah inaynu caalamka la macaamilno oo la ganacsano oo la ina maalgashado soo jiidanona maalgalintii oo Dawladu wax weyn bay qatay waayo marka musuqmaasuqa lala dagaalamo oo profile-kaaga la hagaajisto dadka caalamku wuu kula xidhiidhayaan oo way kula shaqaysanayaan, markaa waxaad moodaa in profe-keenu aad

u wacan yahay magac kasata odayga ha loogu bixiyee oo lacagta ha ururiyo ama musuqmaasuqa ha lala dagaalamee, taasi way keentay in lagu sii dhiirado maalgashigeena oo ay ugu wayn tahay DP World iyo wixii la mid ah iyo lagu sii dhiiranayo meeshii oo la leeyahay wax laga qabto.

Arrimaha la Xidhiidha **Wada-hadalkii Somaliya iyo Somaliland**, arrintaasi waa mid aynu u baahanahay oo sharci ahaan wax badan baa Somaliya inaga xidhan, in la ina aqoonsado oo aynu meel istaagnona waxaa kow ka ah iyada laftigeeda inaynu wada hadalno oo Somaliya ogolaato oo inoo garawdo inaguna la garnaqsano oo nidhaahno waxaynu ahayn laba qaran oo isku darsadaye inaynu kala faatixaysanaa oo kala go'naana wax dambi ah maaha, taasi waxay u baahan tahay kow in la helo bal horta cid dhex-dhexaad ah oo ina dhex joogta oo garawsheheena iyo garteena dhagaysata beesha caalamkana ka maarmi mayso, sidii hada loogu jiray oo dadka la odhan karo dhex-dhexaad bay ka yihiin sida turkiga ma odhan karno dhex-dhexaad bay ka yihiin.

Markaa waxaa ka wanaagsanaan lahayd cid dhex-dhexaad ka ah oo inagu dooranay in lagu biiriyo oo la yidhaahdo hawshaas nagala qayb-gala, iminka waxaad arkayseen oo maalintii dhowayd yimi ninkii Qaramada u joogay Somaliya oo halkan inoogu yimi, waxyaabo badan oo arrimaha dagaalkii tukaraq iyo nabadgalyaadu ka mid tahay ayuu inoogu yimi iyo danaha somaliya iyo Somaliland iskaga xidhan markii uu noqday wuxuu sheegay oo yidhi waxaan tagay Gobol ka mid ah Gobolada Somaliya oo la yidhaahdo Waqooyi-galbeed waa arrin nusqaan ah oo la odhan karo ninkaasi dhex-dhexaad kama aha arrimaha Somaliland iyo Somaliya oo xataa gaadhsiino inuu yahay nin garaad xun oo Goleheena ka soo baxdo inuu yahay qof aan Somaliland laga doonayn mar haduu jiriteenkeedii meeqaamkaas dhigay oo haduu raali-galin ka bixin waayo loo cadeeyo mawqifkeena.

Arrimaha kale ee aan hadlayo waxaa ka mid ah **Nabadgalyada**, nabadgalyadu guud ahaan way wanaagsan tahay oo mushkilad kama jirto, dalkeena waxaa ka dhaca dagaalo qabali ah kuwaas oo waligoodba way dhici jireen ilaa Nabi Aadam oo dhibatadu way jirtay, laakiin mushaakilka maanta yaal waxa weeye oo arrinta cusleeyaywaa haysashada hubka oo dadkii waxay gacanta ku haystaan hubka noocyadiisii kala duwanaa, maanta Dagaaalka Sool ka dhacaya waxyaabaha ugu weyn ee dhimashada kordhinaya ee nabadgalyada in laga gaadho adkaynaya waxa weeye dadkii ilaa Tikniko ayay haystaana iyo hubkii ka wayn kii ciidanka, Marka waxa weeye inaynu ka fakarno Gole ahaan iyo Xukuumad ahaanba war dadka qaabkii hubka aynu ugala wareegi lahayn oo gacantooda looga ururin lahaa, inta hubkaasi gacanta dadka ku jirno dee nin xunina wuu jiraa, tubtii soomaalida iyo tolla'ayeeydii baa imanaysa maalin walbana waxaa inaga dhimanaya boqol iyo wax la mid ah, sidaa darteed, waxaan ku talin lahaa inaynu soo saarno qaab loo xakameeyo haysashada hubka waliba hubka noociisa waaweyn ee halista ee

Ciidamadu ay ku gaashaaman tahay oo shacab iyo dawlad na noqdaa, laakiin hadii beel walba hub intaa le'eg la soo baxdo waa mushkilad wayn.

Waxyaabaha kale ee Nabadgalayada mushkilada ku ah waxa weeye Dhulka iyo khilaafaadka ka yimaada magaalo ha noqoto ama degsiimo ha noqotee, dhulka xeer baynu u samaynay, hadana wuxuu noqday ila dhaqaale oo dadkii waxay u jeesteen inay dhul helaan oo yeeshaan ama dhacaan, sidaa darteed waxaa wanaagsan in dawladu la wareegto dhulkii oo la yidhaahdo dhul qof leeyahay ma jiro, waxa weeye wixii beer ee qof mulkiyad u leeyahay waa caadi oo beeraha waa la yaqaana laakiin wixii dhul ah in la yidhaahdo dawladaa leh sidaas dastuurku qabona waxa weeye Dawaladaa maamulaysa qofkuna markuu yidhaahdo aniga leh la yidhaahdo ma lihid, taasi waxay fududayn lahayd oo yarayn lahayd khilfaadka dhulka iyo mushkilada inaga timaada xaga dhulka.

Mushaakilka kale ee waaweyn oo nabadgalyada halis ku ah oo markaad xarumaha booliiska iyo garsoorka tagtid aad arkaysaa waxa weeye dhalinyaradii yar yarayd oo shaqala'aantu ha keenoto ama akhlaaqiyaadku ha iska burburaane mukhaadaraadka jaadku ugu horeeyo la qabsaday dabadeedna dadka dariiqa isutaagaya oo mobileka ka qaadaya aan una aabe yeelayn qofku dhacaqyo wuxuu yeelayo iyo qiimaha wuxuu dhacayo, talaabooyin badan baa laga qaaday, arrintaas dhalinyaradu waxay u baahan tahay jihayn iyo in sports iyo wixii la mid ah oo dhaqaalahan aynu ururino in mushkiladaha jira jira wax kaga qabano oo mashaariic lagu sameeyo dhalinyarada lagu jiheeyo oo lagu wacyigaliyo inay dalkooda ka shaqeeyaan oo habeeyaan.

Arrinta kale ee Mushkilad ahi waxay tahay arrintii Xildhibaankii ka horeeyay sheegay ee shilalka ahayd, mushkilada ugu weyn ee keenta shilalku waa laba arrimood oo kala ah halka isteerinku gaadhiga kaga yaal iyo haadka aynu marno oo qodob ah iyo qodobka labaad oo ah wadooyinkii oo aad u liitaa baabuurtiina aad bay u soo badatay oo inankii yaraa baloodh baa looga iibiyaa baabuur, markaa dhibaataada ugu wayni waa labadaas arrimood ee isteerinku halkuu gaadhiga kaga yaal iyo haadka aynu marno iyo waddooyinkaas dhintay, Markaa waa laba arrimood oo ah inaynu Isteerinkii rarno haadka aynu marno u rarnaa ama inaynu haadkii ka guurno oo xaga isteerinku kaga yaal baabuurta loo badalaa, markaa arrintaas intaynu dib ugu noqono Xukuumaduna go'aamo ka soo saarto bal haadkii wuxuu noqday mushaakil taagan oo noloshii khatar ku ah, marka waxaan qabaa sharciga dib ha ugu noqono oo nidhaahno arrintaas wax laga qabto.

Xaga Caafimaadka hal arrin ayaa aad iyo aad ii taabatay oo xanuun badan maanta **dadka waalan** ee dalkeena jooga aad buu u waalan yahay oo tobankii labaa waalan, sababtuna waa mukaadaraadka qaadka la yidhaahdo waxaan ku talin lahaa maanta waxa jira ee soo kordhaya ee ciida ka badanayaa waa jaadka soo kordhaya iyo wixii la xidhiidha, markaa waxaan soo jeedinayaa in Miisaaniyada soo socota aynu ku darno in kilo walba la saaro

saddex kun ama afar kun oo aynu ugu talagno dadka waalan oo loo saaro kiiloo walba intaas dabadeedna lagu maamulo cusbitaalada iyo dadka waalan wax loogu qabto, markaa Waxaan soo jeedinayaa inaynu arrintaas meel saarno oo Gudidda Dhaqaaluhuna qoondayso oo culayskaas la saaro qaadka oo la yidhaahdo qofkan adiga waalay ee daawadiisa iyo cusbitaaladiisa waa inaad wax ka bixisaan.

**Arrinta khaatumo iyo Dhulbahante ama Harti la xidhiidha** shalayna Xildhibaan Siciid ka hadlayay runtii arrintaas geed walba waynu u fuulnay, taariikh dheer bay lahayd, arrimo badan bay soo martay, magacyo badana way la baxday kolba sidii loo qaabilayay, waxaa jirtay SSC, horena way jirtay dee Dhulbahante haduu odyaal iyo waxgarad leeyahayba bal marka hore anagu marti kama nihin dalko waxaanu ahayn kuwii wax ka dhisay dalka oo shirkii Burco iyo kii Boorama joogay iyo kii Shiikh ee 1997kii, tabasho badani way jirta oo markaaba way jirtay, laakin waxaanu nahay Muwaadiniin xisaabtamaya oo wixii ka maqan sheeganaya, ma nihin dad marti ku ah oo markhaati beena furaya ee waxaanu nahay dad waxa ay leeyihiin sbeeganaya oo raba.

Arrintaas khaatumo la xidhiidha heshiis baa la galay, heshiiskaas oo ujeedadiisu ahayd inuu dhulbahante iyo khilaafyadaas so oaf-jaro Cali-khaliif baa Madax u ahaa oo inoo yimi intaasoo shir baa lala galay dibad iyo gudoba isla markaana mucaarad iyo muxaafidba waa laga qayb-qaatey, hadafku wuxuu ahaa khaatumo oo Magacii Dhulbahante matalaysay iyo Somaliland inay heshiiyaan way noqon wayday oo waxay noqotay Cali-khaliif iyo xubno la socda ayaa inoo yimi dhulbahante waa soo raaci waayay oo mandate-kii dhulbahante ayay la iman waayeen.

Waxayna doonayaan anagoo halkan joognay intayda siyaasiyaga ah inay kaga saamayn bataan oo yidhaahdaan Dhulbahante anaga matalna, dee hadaad Dhulbahante matasho garaadadiisiina inoo keen, intiisa maqana inoo keen, cabashadiisa iyo wixii ka maqan xali oo adigoo Mandate-kii dhulbahante sida soo fadhiiso oo ku garnaqso, taasna waa laga waayay Cali oo isagoo kaligiisa ayuu inoo yimi dabadeedna kaligii wixii lala gali karayay waa lala galay oo waa la wanaajiyay waana xaq oo waa oday Somaliland hadii la wanaajiyay, isku day wanaagsana wuu sameeyo oo ahayd khilaafkaas inuu dhameeyo laakiin wuu dhamaan waayay.

Haduu dhamaan waayay wax badan baa inaga qabyo ah oo maaha in laga hadho, arrintana iima muuqdaan xaga wax la diiday oo lagu hor istaagaye wali dhankyagana dhibaatadu way jirtaa oo waxaa weeye dadku intay tashadaan nimanka salaadiinta ah ee Garoowe iska fadhiya waxay ahady inay umada soo dhex fadhiistaan oo Somaliland baa gacanta ku haysa dhulkii Dhulbahante deganaaye Puntland gacanta kuma hayso oo Iyana waa qaxooti, qaxootigaasi inuu dadka ku soo noqdo oo la tashado maxaa inoo dan ah yidhaahday ahayd, waxaan leeyahay soo noqda aynu tashano wax inaga maqan aynu isla eegno markaasay suurtagal tahaye.

Arrinta la xidhiidha waxyaabaha ka maqan dadka deegaankaas ku nool waxay badan yihiin oo waxaanu leenahay matalaad siyaasadeed Somaliland kuma hayno, Golaha intaanu ku fadhino waadna aragtaan, Xukuumada saddex Wasiir baa ku jira Hartina marka la isku daro waa shan Wasiir baan u malaynayaa, xukuumadu intaas kaliya maaha marka laga tiriyo Miisaaniyada horteena taal 23 Hay'addood oo Madax banaan baynu ansixinaa mid kaliyana kuma jirno magacyadoodana halkan ayaan ka xaadirine marka lagu beeninayo ayaa lagu odhanayaa midaa baa halkaa ka shaqeeya ama komishan hebel baad xubin ku leedihiin, waxa weeye ma lahayn xaq oo cid ma gaynay? Waa haa, markaa waxaasi waa waxyaabaha dadku tabayaan ee tabashadoodu jirto.

23kaas hay'addood ee aan tilmaamay intaan ka gudbin markaan u koobo saxaafada waxaa ka mid Maxkamada Sare, Bangiga Dhexe, Hay'adda Shaqaalaha, Hay'adda HIV/AIDSka, Garyaqaanka Guud, Hanti-dhowrka Guud, Sooyaal, Dib u-habaynta Shuruucda, Komsihanka Xuquuqal Insaanka, Komishanka Miino Saarka, Komishanka Tacliinta Sare, komishanka Mihnadlayaasha Caafimaadka, Hay'adda Duulista Hawada, Hay'dda Aabaabul ka saarka, Gudidda Qandaraasyada Qaranka, Gudidda Doorashoouinka Qaranka, Hay'adda La-dagaalanka Musuqmaasuqa, Hay'adda Tayada, Hay'adda Qaxootiga, Gudidda Free Zoneka iyo Gudidda Dekadaha, Waxaas oo dhan baa jire bal waxaad ii sheegtaan oo ii soo baadhaan wax hal qof ka badan. Xeer-ilaalinta Guud oo kale hadaad aragto qof galaya oo Harti waa qof dambiile xadhig ah oo la waddo ama waa mid dambi ka cabanaya xataa shaqaale ma joogo dareewal ha ugu yaraadee.

Markaa waxaas oo dhami dib u eegis bay u baahan tahay oo dalka waa la wada leeyahay, marka wax la magacaabayo waxaa la odhanaya dalka waa la wada leeyahay oo waxaa laga eegayaa saddex habrood ee dalka wareeriyay, war intaas dad ka badan baa dalka wada leh dalka inaynu qaybsano ayaa loo baahan yahay. Axsaabta waxaan la qabaa xildhibaankii shalay halkan ka hadlayay hadaan doonayo inaan isu taago Doorashada 2023ka xagaan iska sharaxaa saddexda xisbi reeraha kala haysta iima ogola, axsaabtiina lama furayo, taas waxaan ku talin lahaa Madaxweyne axsaabtii hadaad furiwaydo dee dal la wadda leeyahay noqon maayee axsaabta waa inaad furta oo dadka kale helaan meel iska taagi karaan oo aan helaa meel iska soo sharaxi karo.

**Arrinta la xidhiidha mushaakilad dhowr ah oo jira iyo furista dastuurka,** furista Dastuurku saddex arrimood buu muhiim u yahay, saddexdaas oo kala ah: -

- In dadkaas aan Beesha dhexe ahayni helaan matalaad siyaasadeed si dadku wax u kala yeeshaan oo awoodi la qaybsado.
- Saami-qaybsiga oo ay hortaagan yihiin labada Qodob ee 40aad iyo 62aad ee Dastuurku, labadaas qodoba waxay dabreen tiradii labada Gole ee Guurtida iyo Wakiilada oo ay leeyihiin 82 iyo 82 bay ahaanayaan, aduunkana wax la yidhaahdo Xeer baa lagu tilmaamaa oo dadku way kordhaan, tiradu way badataa, dhaqaale ayaa lagu saleeyaa, dhul baa lagu saleeyaa, marka intaynu qafil ku jabinay baynu

leenahay ha la kordhiyo iyo Gobolkaas ha loo kordhiyo waxaynu balancegarayn lahayd dadkeena dhaqaalihiisa iyo deeganaday degan yihiin, dabadeedna waxaynu qiimayn lahayn saamigiina iminka sanduuq buu inaga xidhan yahay oo labaduba waa min 82 aan la jabin Karin, marka macno inoo samayn mayso 82 Guurtida oo meel fadhida baahidooduna ma jirto maanta oo saddexdii xil ay inoo hayeen mid wuxuu ahaa arrimaha diinta maantana sheikh dhex fadhiyaaba ma jiro barigii hore ayayba ku jireene, tan kalena waa dhaqanka oo dadkii dhaqanka caruurtoodii baa joogta, tan saddexaadna waa Nabadgalyadoo wax dheeraad ah oo ay u haystaan ma jirto. Sidaa darteed waxaan ku talin lahaa waxaan 30 ka badnayn in inta iyaga laga dhigo tirada Golaha Wakiilada la kordhiyo oo taas inta laga soo jarayo ha lagu daro,

- Arrinta saddexaad ee Dastuurka loo furayaa waa tan Kootada dumarka oo dastuurku muu kala saarin wax jinsiyad ah, markaa iyagana hadii aynu leenahay meel aynu wax u saarnona waa inaynu dastuurka u furnaa oo ku tilmaamnaa.

Marka saddexdaas arrimood ayaa loogu baahan yahay in Dastuurka la furo, marka anigu waxaana ku talin lahaa inaynu dastuurka furno oo ku dhiirano awoodda Gole ahaan inaga iska leh saddexdaas arrimoodna meel saarno. Xisbiyadana sidaas ayaan jeclahay in iyagana la furo.

**Arrimaha doorashada la xidhiidha,** Doorashoyinkii Golaha Wakiilada iyo Golayaasha Deegaanka ayaa hadhsan, arrimahaas doorashada wuxuu Madaxweynuhu iska taagay meel cad wuxuuna meel dhigay lacagtii isagoo u yeedhay hay'adihii Caalamka wuxuu waydiiyay lacagtii qoondada ayay bixinayeen, Madaxweynuhu wuxuu yeedhay Xisbiyada kale ee Mucaaradka oo yidhi kaalaya ka heshiinee wixii inaga inagu xidhan, xisbiyadii way ka boodeen albaabka dambay ka baxeen, waxay istaageen meel aan ku haboonayn oo ah ha lakala diro Komishanka Doorashooyinka, xeer iyo nidaam loo raaco ayay leeyihiin, xeerkii iyo sabab loo badalaana meesha ma taalo, waa mar-marsiiyo ay ku hor-joogsanayaan oo ay ku diidan yihiin Doorasho inay dalka ka dhacdo iyagoo doonaya inay ceebteeda Xukuumada saaraan, laakiin ceebteeda Xukuumadu ma lahee iyagaa leh oo ay saaran tahay.

Halkaa markay dhaaftay waxay gaadheen inay yidhaahdaan Doorashadiiba waanu ka maaranay oo Xildhibaanadyada iyo Golayaasha waxaanu ka soo dooranaynaa Shir-beeleed aanu qabanayno oo aanu ku soo saarayno Golayaashii Qaranka, taasi ceeb bay qaranka ku tahay, taas mecneheedu waa Qaran ma jiro dawladna ma jirto, Madaxweynena ma aqoonsanin

**Point of correction**

**C/qaadir Jirde: -** Gudoomiye hiilku in Xukuumada loo hiiliyo way fiican tahay laakiin yaan axsaabta been laga sheegin dee meel ay ku sheegeen shir-beeleedkaas ma jirto Xildhibaankana waanu dacwaynaynaaba.

Way iska imanaysaa hadii la yidhaahdo shir-beeleed baa la qabanayaa oo doorashii laga maarmayaawaxay dhalaysaa in wixii doorashada laga doonayay oo dhalaysaa, doorashadana waxaa laga doonayay in Golayaashii sharci-dejinta iyo Deegaanka la helo, waxaana imanaysa in la yidhaahdo madaxweyne ma jiree Madaxweynena aan doorano, sida daraadeed, waa arrin sharciga meel ka dhac ku ah, waa arrin nidaamka meel ka dhac ku ah, waa arrin fariin loogu dirayo caalamka inaynu nidaamkii dimuqraadiya ka noqonayna, waxaanu u sheegaynaa Caalamka inuu wali jiro nidaamkii iyo Dimuqraadiyadii, hadii ay ka noqon waayaana hay'adihii ku shaqada lahaa ba qabsanaya, xisbinamadooduna wax samada ka soo dhacay maahee xeer bay ku timi oo ku dhisan tahay oo shuruuday ku taagan yihiin, hadii shuruudahaas waayaan Xisbinimaday luminayaa, waayo haday yidhaahdaan beelaynu nahay dee markaa xisbiyo maaha wax kalaa loo gudbayaa, sidaa darteed, waxaan leeyahay Xisbiyadu ha ku soo noqdaan xayndaabkii

**Md. Axmed Barkhad Obsiiye** ***(04 min, 08seconds)*****:-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha dhamaantiin ASC, Xildhibaan Maxamed Jaamac wax wayn buu ka hadlay oo intaas uu sheegayba waan la qabaa, waxaana loo baahan yahay isbadalka dhacaya dhamaanteen iyo Gole ahaan inaan la socono, tan kale arrimaha gudaha waxaad moodaa in dalkii u soo fidayo Gudaha oo uu soo koobmayo waayo Badhan waad aragteen oo Puntland baa ka doobinaysa, Dhumay maanta waxaa ka talinaya odayaal badan oo somaliya iyo itoobiya ka yimi, anigu waxaan ka baqayaa in ciidamo nabad ilaalina oo aan somaliland ahayn in la keeno oo dhumay sidaas lagu yeesho Somaliland ay ka baxdo, markaa arrimahaas aynu ka taxadrno ayaa loo baahan yahay, dadkaas walaalaha ilaahay ha kala qaboojiye in la dhexgalo oo aynu u gurmano ayaa loo baahan yahay.

Tan kale, xataa galbeedkan waxaa jirta inay dhux dhux socoto oo rag leh nabad baanu ka talinaynaa oo nabad baan doonaynaa leh baa dhex socdo aan ka baqaynaa wax kiciyaan markaa taasna in laga taxadiro oo lala socdo ayaa loo baahan yahay, waayo waxaa dhici karta in meel kale laga soo diray oo la leeyahay Somaliland xagee kale ayay ka jilicsan tahay galbeedkana ha laga bilaabo.

Xaga dhaqaalaha, walaahay maanta aad baynu uga liidanayaa, dadku xaalad adag buu ku sugan yahay, shillingkeenii waxba maaha maanta oo shaqaalihii iyo Ciidankii waxyar qaadan jiray maanta waxay u taraysaa ma jirto, war in dib loo eego oo lacagteena qiime adag loo sameeyo ayaa loo baahan yahay ama dadka intaas oo wax loogu daro shaqaalaha iyo Ciidamada, marka waa sidaas oo xaaladahaas ayaa taagan, waynu ognahy oo jabhad baa ka samaysan tahay bariga oo cabsida ceergaabo taal waad arkaysaan oo Badhasaabkii baa lagu weeraryaa, janankii baa tagay lagu weeraray wax ka

wayna way ka soo socdaan oo waxaaa la yidhi nuujo naaso taatabasho ayay ka kacdaa ninka la leeyahay halkanuu weeraray derarwaynu weeraray dee nuujo naasa taataabashay ka kacdaa weeye dagaal wayn inay noqoto way dhici kartaa.

**Md. Cabdi Hiirad Warfaa** ***(04 min, 56 seconds)*****:-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha, saxaafada iyo shaqaalaha dhamaantiin ASC, waxaan marka hore 100% taageersanahay doodii Xildhibaan Maxamed Jaamac oo aan raali ka ahay.

Markaan taas ka gudbo waxaan ka hadlayaa Nabadgayada, Derarweyne iyo aagaas ceelafweyn waxba laga sheegayaa laakiin wali arrintii gacanta lagu hayaa wixiii ilaahay dilayo cidina ma baajin karto, waxaan u rajaynayaa in arrintaas gacanta lagu hayo si wanaagsan lagu dhameeyo, Tukaraq markaan u gudbo waa Deegaan wayn, dadbaa ku nool, dagaala ka dhacay oo intaa waa la is tuur tuurayaa oo dhibaata ka taagan oo waxba kuma nool dadka halkaas jooga dhexgal baa loo baahan yahay iyo in wax laga qabto, dedaalna wuu jira oo ha noqoto Qaramada Midoobay ciday soo dirtay waxna kama qabsoomin, arrintaas in aad looga warhayo oo wax laga qabto ayaan soo jeedinayaa.

Markaan u gudbno, Colaadda Koonfurtaas Laascaanoodna Golewayne ahaan xataa tacsi maynaan dirin oo waynu ka xunahay wixii dhacay xataa maynu odhan, waxaa la yidhi meel nin taagan yahay hali ma marto, meeshaas wixii ka dhacay raali kama nihin cidii wax ka qabanaysana raali baanu ka nahay, waxna uma qarsoona.

Magaalada 100km laascaanood ka sokeeya 70km ka shisheeya baa aniga la iga soo doortay oo aan deganahay MCH malaha, rug booliis malaha, waddo ma laha hadii roob da'o magaalooyinku laba laba wiig bay kala xidhmaan, hadaad la soo qaadid fulint meelo ayaanu u gacan haadinaynaaye raali ahaw baa lagu odhanayaa, Booliiska Madaxdiisa hadaad la soo qaadidna waxaa lagu odhanaya guri samayso, 10 magaalo oo isku xigta hal baabuur haday haystan waxba qaban karaa, waxaa jirta meelaha qaarkood hadii gabadh ilmuhu ku qaloocdo awr baa lagu soo qaada oo waddo lagu soo dhoweeyaa, taasina maaha mid na qabata.

Shirkii Caynabo ee Khaatumo iyo Somaliland go'aan baa la isla gaadhay oo Maxamed Jaamac baa si faahfaahsan uga waramay cidna magan uma nihin, cidna ma baryayno oo ma daba fadhino, wax badana waanu tirsanaynaa in Dastuurka la furo oo arrintaa oo waxa naga maqan lagu qoro inaga xil inaga saaran yahay baa loo baahan yahay, saami qaybsiga arrintaas la dartii loo raaciyo, waxaan leeyahay hore baan u idhi meel nin taagan yahay hali ma mari karto, umilihii dhir bay fadhiyaan, caruurihii dhir hoostood bay fadhiyaan waxtarna ma gaadhin, markaa bilaash baanu hadhqoodaalkan u fadhinaa, inaanu u gaysano indhaha iyo inaanu wixii aan qaban karno qabano baanu diyaar u nahay.

**Md. Xuseen Axmed Caydiid** ***(30 min, 58seconds)*****:-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha, saxaafada, shaqaalaha iyo marti-sharaftaba dhamaantiin ASC, Mudane Gudoomiye

dooddan ilaa shalayto inoo socotay waxaana fiican inaynu si constructive ah u eegno oo wax dhisaysa, wixii dhaloolo ah ee jirna la sheego si aynu wax ugu toosino, waxaana ii muuqatay Gudoomiye ahaan intaad doodda hagaysay wakhti ku filan intuu kaga dhargayaa la siinayay qof walba, taasina inay sidaas u socotaan rajanaynaa, xildhibaanadana waxaan ka codsanayaa in si miyir qabta la isu dhagaysto, Xildhibaankii hore loo dhagaystay uu ka dambe dhagaysto kan dambe si loo dhagaysto ka hore dhagaysto, inyar oo tacliiqaan ku darayaa oo Goleheena waxaad moodaa Xildhibaanadu markay ra'yigooda dhiibtaan iska dareeraan oo qofkii xaga dambe ku qorani hool madhan buu ku soo hagaagayaa, taasina ma fiicnee hadii lagu dhagaysato in aad iska baxdo maahee adna sidii laguu dhagaystay iska fadhi oo dhagayso.

Dooddayda waxaan ka bilaabayaa Siyaasada Arrimaha Dibada Xildhibaano ayaana hore uga hadlay wax badan oo aan laqabo way sheegeen, aniguse dhankaan ka eegayaa waxa weeye siyaasada arrimaha dibada wax badan baa kaga xidhan xaaladda arrimaha Gudahu kolba siday tahay oo marba sida Guduhu yahay bay noqonaysaa tan arrimaha Dibaduna iyadoo marwalba u baahan dedaal badan oo la galiyo, markaa waxyaabaha Siyaasdaa Arrimaha Dibada wax ka tari lahaa ee Gudaheena inagu gacanta ku haybo ayaan doodayda u badinayaa.

Horta Maamul Wanaaga xagaynu ka joognaa? Marka maamul wanaag laga hadlayo waxa ugu horeeya ee la soo qaadayaa waa ku dhaqanka Sharciga, hadii dal shuruucduu dhigtay ku dhaqmi waayo cid wax ka maqlaysa oo wax ka dhagaysanaysaa ama aaminaysaa way yaraanaysaa horta, xagaynu sharciga ka taaganahay xataa hadaynu nahay hay'adihii waaweynaa ee Madaxtooyo iyo Golayaal ahaa iyo kuwii hoos imanayay inaynu qiimayn ku samyno halkaynu ka taaganahay ku dhaqanka sharciga aya ka hadlayaa anigu.

Markaynu eegno arrimaha maalgashiga Xeer kaas oo ah Xeer Lr 29/2004 soo baxay ayaynu arrimaha Maalgashiga u dhiganay, cidkasata oo doonaysa inay dalka maalgashato ee shisheeya ahi waxay eegaysaa Xeerkaas aynu u dhiganay wuxuu qorayo, waxa kale oo ay ka eegtaa hay'adda Garsoorka inta badan, siduu u dhishan yahay, siduu u madaxbanaan yahay ee loogu kalsoonaan karo ee khilaafaad wixii yimaada u xalili karo, mrkaynu arrimo aynu maalgashi ku sheegnay oo hore ka soo gudubno oo Golahan ansixintiisa la keenin oo Xeerkii Maalgashiga aan loo raacin, waxaan qabaa halkaa horta gef wayn baa ka dhacay Xeerka iyo Maalgashi waxaynu sheegna isma, taasi waa qodob aan doonayo halkan inaan ka rise-gareeyo, waxaanay kalifaysaa marka sidaas sharciyadii looga boodo inay kalifto qofaf in heshiishkii ku dhisnaado qofaf oo qof markaa xil muhiima haya heshiiskii ku fadhiyo, halkii uu heshiis la kala dhaxlo oo wakhti dheer socda u noqon lahaa wuxuu ku soo koobmayaa qofkaas uun, arrintaasina waa Xeer la jabiyay oo Golahanina eediisa wax ku lahaa.

Dhismihii Xukuumada, Xeer baa jiray Golahani Ansixiyay oo Xeerka Nidaamka Xukuumada la yidhaahdo kaas oo qaab-dhismeedka Xukuumadu yeelanayso tilmaamay, hadii la doonay qaab-dhismeedkaas wax ka duwan oo xukuumad ah la dhiso marka hore waa Qodobada Xeerkaas wax ka badal lagu sameeyaa oo la badalaa, hadaba iyadoon qodobkii aan la badalin hadii dhisme Xukuumadeed oo Xeerkii khilaafsan la keenaa Goluhuna uu Ansixiyaa taasina gef bay ku tahay Sharciga, hadii aan la badalin Xeerkii Goluhu inuu celiyaa bay ahayd oo yidhaahdo ama Xeerka soo waafaji ama marka hore Xeerka wax ka badal sidaad doonayso ah ku soo codso oo keen, waxaan qabaa Wasaaradu badan oo maanta la sameeyay oo kharash ku baxayo oo macaamilaad sameeya oo bilaa Xeer ah oo meel ku xusan yihiin aanu lahayn baa jira, taasi waxay tilmaamaysaa oo markhaati ka tahay inaynaan u hogaansanayn Xeerarka aynu dejisanay inaynu raacno.

Dastuurka marka aynu xaga cashuuraha eegno ka hadlaya ayaa jira sida Qodobka 14aad iyo Qodobka 54aad labadaas qodoba cashuuraha iyo takaalifahay ka hadlaan, tusaale Qodobka 14aad wuxuu leeyahay “Cashuuraha iyo Takaaliifta waxaa danta iyo Maslaxada Bulshada” waxa kale oo uu sheegayaa in Cashuur ama Takaaliif aan Xeer jidayn la qaadi Karin, waxa kale oo uu sheegayaa qiimaynta, ka dhaafida iyo ka badalka Cashuurahaas uu Xeer jidaynayo. Halka Qodobka 54aad isna ka sheegay in Awoodda iyo Xeer-dejinta Golaha Wakiilada waxay gaadhsiisan tahay u gaar ahaanshaaha arrimaha Maaliyada sida jidaynta Cashuuraha, takaaliifta iyo talaabo kasta oo kor loogu qaadayo dakhliga.

Saakadaas aynu joogno warqadan saxaafada taala oo uu Wasiirka Maaliyadu soo qoray taasoo uu qiimihii shidaalka Berbera imanaya uu yidhi sidiisii buu ahaanayaa halka qiimiha shidaalada kalena tankii lagu kordhiyay $75.32 lagu kordhiyay foostadii $3 dollar baa raacaya ayay noqonaysaa marku litre-ka ku dhaadhaco xaga qiimaha (value) ka kordhi ama xaga rate-ka kordhi labadaba marka la isku dhufto labaduba waxay dalacayaan shidaalkii, waxay dalacayaan nooligii, kiradii buu raacayaa, danyartii buu taabanayaa, markuu sidaas Xeerkii tilmaamayo isna dakhliga kor u qaad isleeyahay, iyadoo talaabo kasta oo Dakhliga lagu kordhinayo ay tahay inuu Golaha Wakiiladu Xeer ku jideeyo ayuu dastuurku tilmaamayaa, Xeer Dastuurka ka horiman karaa ma jiro mar haduu sidaas dastuurkii yidhi.

**Arrimaha Doorashooyinka,** waa dhab Xeer baa jidaynaya doorashooyinka, xeer baa jira Komishanku ku asaasan yahay iyo Xeer arrimaha Doorashoyinka loo raaco oo waxaas oo dhami xeerar bay ku dhisan yihiin oo waynu isla garanaynaa, mana jirto cid leh maanta inta xeerka la jiidho waxaas ha la sameeyo ama tirada ha la kordhiyo iyadoon Xeerka waxba laga badali ama komsihanka ha la kala diro iyadoon Xeerka loo raacin cid leh ma jirto, laakiin waxaa la leeyahay Masuuliyiinta Qaranka heerkasta Madaxweyne illaa biyotooni qof aan qaab loo shaqaaleeyo iyo qaab looga saaro shaqada aan lahayn ma jiro,

Komsihankuna kuwaas ayuu ka mid yahay oo qaab xilka loogu dhiibo iyo qaab looga qaaduu leeyahay, aynu taas u raacno baanu leenahay.

Tii maxay qoraysaa? bal halkan ayaan ka akhrinayaa dhagaysta, waxay leedahay **Faqrada 1aad** "***Xubnaha Komishanka waxaa xilka laga qaadi karaa (a) markuu jabiyo shardi ka mid ah shuruudihii lagu soo doortay, (b) Markuu Xilka gudan kari waayo karti daro ama caafimaad daro awgeed, (c) Markuu ku kaco anshax xumo, xattooyo, Musuqmaasuq iyo wixii la mid ah",*** kuwaasi waa sabbaha laga qadi karo Xilka, cidkasta oo soo codsatay in xilka laga qaado komishankana sababahaas bay soo maraysaa oo wax ka soo qoraysaa, Gudoomiye qoraal dheer baad haysaa oo 14 warqadood ah oo 30 dhacdo oo si balaadhan u dhacday mid walbana Xeerkii waajibnayay ku hor qoran yihiin, sida komishanku ugu gafay iyo sida Xeerku waajibinayay ay isku garab qoran yihiin, Madaxweynaha ayaa loo diray oo ay ku socotaa Shirugodoonku nuqul buu ka hayaa, marka halka ha laga eego in la soo maray sababihii oo Xisbiga leh ha laga qaado uu qodobadaas adeegsaday halkaasay ku qoran tahaye, mudanayaashana u sheega dee in samada laga soo dhicin ee processkii la soo maray.

**Farqada 2aad** marka laga yimaado tan hore ee inuu komishankii xilkii gudan kari waayay iyo inuu jabiyay sharcigii marka eego ***"Waxa Madaxweynuhu Magacaabaya gudi baadhiseed oo ka soo tallo bixisa si go'aan uga qaato"*** hada waa amar waajib ah, Madaxweynuhu inuu isaju jawaabo uma banaana, markhaati inuu furo uma banaana Xeerku wuxuu waajibayay inuu saaro Gudi baadhiseed oo waxay soo jeediyaan uu ku go'aan qaato, haday soo sugto wixii lagu eedayay inuu process-gareeyo xilka qaadistoda, haday taageeri waydo wixii lagu eedeeyay markaa yidhaahdo ma sugmin, iminka sideed bilood baynu ku kala maqanahay sidaas oo Madaxweynuhu uu markhaati la soo taagan yahay qodobkana hoos uma eegin maxaa kula gudboonaa inaad yeesho ilayn eed baa kuu timi, xisbi qaran baa soo eedeeyay, talabo uu xaq u lahaa buu qaaday ee adiga Maxaa kula gudboonaa oo xaq laguugu leeyahay bay ahayd mana dhicin.

**Farqada 3aad** waxay leedahay hada mudanayaal baa halka ka lahaa madaxweynuhu awood uma laha, isaga laftarkiisa yidhi awood uma lihi, xildhibaano kale oo Xisbiga Kulmiye ah baa lahaa awood uma lahee bal hada dhagaysta waxay leedahay farqadaas 3aad ***"xil ka qaadista Komishanka waxaa awood u leh Madaxweynaha waxase shardi u ah inuu Golaha Wakiiladu ku ansixiyo xil ka qaadistaas cod hal dheeri ah"*** awoodii uu eegi lahaa oo uu Golahan u keeni lahaa oo simple majority uga heli lahaa ama uga waayi lahaa lama hayo oo muu soo marin, markaas marka la leeyahay xisbiya wax kale ku dhawaaqay dee waddadii la mari lahaa markay halka ku awdan tahay oo ninba albaab saaro oo la mari maayo yidhaahdo maxaa marka laga eegaa kalifimayso, maxaan eeganaa hadaynu sharcigii isku raaci la'nahay.

Halka Gudoomiye waxa ooday oo hadii cid cadho ka yeedhsiiso shir qaran baa la qabanayaa oo tii sharciga ahayd ee Baarlamaanku ansixiyay ee cid waliba inay raacdo

ahayd ayaa lagu gar qaadan la'yahay oo la mari la'yahay, horta taas ayaan rabaa inaan hoosta ka xariiqo. Xaga tirade 7 xubnood baa qoran, wuxuu Xeerku tilmaamayaa inuu madaxweynuhu soo magacaabayaa ka dib markuu helo soo jeedinta Golaha Guurtida oo laba xubnood soo xulay iyo Xisbiyada iyo Ururada mucaaradka ah oo dhan hada waxaa laga yaabaa inay ku soo beeganto xili dhowr iyo toban urur ay furan yihiin, marka urur siyaasadeed oo dhan la isu keeno dhowr iyo tobankaas 2 xubnood baa la siiyay, madaxweynaha oo xisbi ahina 3 buu ku soo darayaa iyadoo waxaas oo ururo iyo xisb labadaas kaliya la siiyay, maantana labada Xisbi ee jiraa haday 2 soo xulaan, Madaxweynuhuna 3 xubnood oo laba halkan yaala oo Guurtida ah 5 xubnood baa u tirsan, ma cadaalad baa.

War dumuqraadiyadeena halka laga eegayo Xeerarkeena iyo nidaamkeenu iyo dawlad wanaageenu waa Xeerarkaa, doorashada wanaageeda iyo siday u dhacayso halka laga saadaali karaa waa komishanka iyo sida loo soo xulayo iyo siduu dhex-dhexaadnimadiisa, hadii aanu dhex ahayn oo laga cawdo awalba waa laga caban jiray oo xisbiga kulmiye ayaaba cabashada hogaamin jiray oo aniga iyo Gudoomiye Baashe waa ogyahay in Kulmiye ka soo caban jiraye, haday maanta cabashadii taagan tahay, nin waliba ma markuu kursiga tago ayay macaanaataa oo uu yidhaahdaa anigaa ku boodaya tii khaldanayd, waxay illa tahay sidaynu marka horeba u arkaynay inay khaldan tahay sidani Kulmiyay ayaan la hadlayaa aynu saxno oo si cadaalada siidhiwale xaq oo cadaalad ahi siidhiga ha inoo wada qabto.

Ma lihin iyadoo 7 qoran tahay ha laga dul magacaabo, halkan waxaan u sheegaya mudnayaasha leh xeer baa jidayna, war dee Xeerku wax ka badal buu u baahan yahay oo wuu ina horyaalaaba, qodobada wax laga badali karo bay ku jiri karaan, waligoodba qodobaday ku soo heshiiyaan baa Golaha si fudud u mari jiraye ha ku soo heshiiyaan stakeholdersku Goluhuna si fudud ha isu dhaafiyo wax ka badalkaas lagu soo heshiiyay oo tilmaamaysa in sifo lagu soo heshiiyay oo siidhi wale cadaalad ah oo dadka u dhexeeyaa la soo xulay oo qodobkaasi ha inoo raaco Xeerkan la inoo soo gudbiyay ee wax ka badalka u yaala, waayo wax ka badaladaas hore ee iminka meesha la keenay Xisbiga Wadani qayb kama ahayn, dhaqankuna wuxuu ahaan in saddex xisbi iyo Komishanku inay wax ka badal wada keenaan, dabadeed xukuumadu sidaad ku gudbiso, iyadoo laga maqan yahay ayaa xeer la soo gudbiyay waa isku cadhin, waana waxyaabaha ina kala fogaynaya.

Hadii komishankii Xeerkii la soo gudbiyay oo Madaxweynaha looga dhigayo Xilgudasho, hadii lacag laba milyan u sii daayay oo looga dhigayo xilgudasho iyadoo lagu kala maqanyahay, anigu waxaan qabaa iyo dad badan ila qabaan oo xisbiga ah in doorasho aan lawadagali doonin oo lacag iyo wakhti lagu khasaarinayo halkaynu ku soconaynaa ay tahay doorasho aan la wadagalayn, hadii aan la wadagalina aan meelnaba ka dhacayn, Madaxweynaha laftigiisaa sheegay in hadii aanu Waddani galayn anana aan

galayn, markaa maxaa lacagta loogu bixinayaa haday sidaa tahay, anigu waxaan qabaa inay lumin hanti qaran tahay, taasna intaas ayaan uga gudbayaa.

Waxyaabaha dawladnimo wanaageena xumaynayaa waxaa Iyana ka mid ah mudda dhaafka Doorashooyinka, waliba iminka doorashooyinkii Golaha Wakiilada iyo Guurtidu oo guurtida 21 sano ayaa u dhamaaday oo walina ma laha xeer lagu soo doorto isaguna eed malaha oo anigu waxaan qabaa eed Goluhu ma laha ee ciddii u samayn lahayd Xeer iyo cidii doorashada qaban lahay ee Golaha badali lahayd ayaa eeddaas leh, horaa loo sheegay oo loo yidhi Golaha Guurtidu kii hore ee Culimada iyo raga dhaqanyaqaanka ahi isug tagay maahan kani waana run, ugu yaraan kala badh in ka badan wakhtigoodii way qaateen oo caruutoodii baa soo gashay.

Markaa sidaa tahayn cid ilaa hadda ku maqan oo Xeerkiisii ku maqano diyaarinaysaa ma muuqato, facebookga oo Dr. Sacad Cali shire oo inta la waraystay hadalkiisa maan dhagaysan oo ku dambaabi maaye laakiin waxaa lagu dul qoray Sacad Cali Shireoo sheegay Golaha Guurtidu wakhi malaha oo term go’an iyo wariyaha waraysanahay oo aan sixin ama ku qaban oo aan odhan wuu leeyahay maxaad u jeeddaa ayaa ku dul qornayd, dee waxaynu ognahay inay lix sanadood bay ahayd lix iyo 21 sano intay isu jiraan waynu aragnaa.

Golahan Wakiiladuna waa sidaas oo 2005tii baa la soo doortay isagana wakhtigiisii wuu dhamaaday, labada Goleba khalad ma lahee xukuumad iyo Madaxweyne qaban qaabisa arrintaas doorashada oo stakeholderska isu keenta oo arrintaas dib u dhacyada meesha ka saarta aan la helin waxaynu ognahay siyaasad arrimo dibadeed baynu ka hadlaynaa in dhaawac ka sii badan intii gaadhay inuu iman doono, anigu waxaan ahayn xildhibaanadii Golaha soo gala malaha hal xidhibaan baa iga dambeeyay baan u malaynayaa, haday sidaa tahay hadana wali ra’yigii markaan dibada joogay qabay baan qabaa oo sharcigii iyo nidaamku inuu ku wanaagsan yahay in doorashooyinkeenu ku dhacaan xiligoodii oo dib u dhacyada ka ilaalino masuuliyadahana sidaynu u kala leenahay u kala gudano, taasna intaasan ku dhaafayaa.

Waxaan uga gudbayaa xaga saami-qaybsiga mar xaga sare, waxaa la soo galay shir beeleedyo haduu burco ahaa, haduu Boorama ahaa iyo haduu Hargeysa ina haa ragii joogay baan ka mid ahaa, kii booramaa ugu badnaa oo saddex bilood oo 150 guurti ah fadhiyay siyaasiyaantii dalkoo dhan isugu timi oo mar qaab-dhismeed dawladeed laga hadlo oo cahdi qarameed lagu saleeyo iyo mar nooca dawladeednimo ee aynu leenahay laga hadlo ma presidential buu noqonayaa, mise parliamentary buu noqonayaa iyo qolo soo jeedisay in gudi madaxtooyo la sameeyo, shirkaa boorama Masuuliyiin siddeed xilalka sare ahaa oo heer qaran ahaa isfaham baa laga soo yeeshay, ismahankaas oo ahaa kii inta badan lagu dhisay Golihii ugu horeeyay Somaliland 1993 ayuu ahaa, kii lagu dhisay maamuladooda iyo Shir-gudoonadooda ayuu ahaa maanta haduu sidii khilaafsan yahay waa laga wada hadlayaa oo waxaasaa khilaafasan baa la odhan, hadaynu si kale

uga guuraynona waa halkeeda, laakiin waxaa inoo yaal meel aynu heshiis ka hayn oo goob joog ka ahayn oo aynu wax ku dhisnay.

Laakiin hadii ay tahay shaqaale iyo madax-qaybeedyo meel aan cabanayn ma jirto oo Gobol ku kaliya cabashaadaas, hadaad u qaadataan in darafyada cadaalad daro taalo halka dhexe cadaalad laga dhergay sidaas maaha, todobada xildhibaan baanu halkan deegaan kaga fadhinaa, waxaan deegaankaas ku ogahay saldhig booliis oo baligudbadle ah, MCH wax sheegtana hal baan ku ogahay oo Baligubadle ah, todoba xildhibaan oo cod ku soo baxay oo aan isxambaar ku soo bixin ayaanu ku fadhinaa, saddex Gobol baan ka hadlayaa oo saddexda Gobolba waa sidaas, hadaad dhagaysanayseen wiigan waxay gudidda qandaraasyadu yeedhiyeen todoba mashruuc bay yeedhiyeen, todobada masharuucba deegaanka bari baa la geeyay, war cadaalad daradu aanu saxano waa wangaasan tahay hadii Bari wax ka maqan yihiin anigaaba u doodayee, laakiin aynu mid ka saarnoo isku duubkan aad leedihiin waxbaad wada dhacdeen, dee aynu eegno meesha dhaco jiro oo hadii wax naga maqan yihiin noo hadla oo meeshii wax ka maqan yihiinba ha loo hadlo, kuwa buuxsadayna aynu ka qaadno taasna diyaar baanu idiinla nahaye.

Waxaan uga gudbayaa arrimaha Dawlanimo Wanaaga laga eego ixtiraamka, Xaq dhowrida iyo ilaalinta xuquuqda aadamaha, hadii dal la ixtiraami waayo xuquuqda aadama oo dalku shuruucdiisa isu raaci waayo iyana waxay noqotaa dal aanu caalamku ku dhiiran la macaamilkiisa oo dunida takoor ka ah, markaa waxaan qabaa dadkii la iska xidhay ee hebel waxaasuu ku hadlay iyo hebel waxaasuu qoray inay badatay oo ay xabsiyada ka buuxaan, waxaan qabaa arrinkaasi dawladnimadeena uma qurux badna, waxaa badbaadi waayay waliba Masuuliyiintii Xisbiyada Mucaaradka oo iyaga waliba xeer gaar ahi siiyeen inay dhaliilaha xukuumada ee jira tilmaamaan si loo saxo ama hay'adihii masuuliyada lahayd ay ugu baraarujiyaan oo talaabo uga qaadaan, kii hadlayow maxaad u hadashay bay maraysaa.

Waxaaba dhacaysa in Hay'adihii qaranku is-ilaalintii ay lahaayeen kala gudan kari waayaan, waana xaalad jirta, waayo tusaale ahaan saddex waaxood ee qaranku dawlnimo wanaagay ka mid yihiin oo waa rukona assaasi mid waliba halkiisa kaga taagan yahay, hadii mid fadhiid noqoto dheeli tirkii baa meesha ka baxaya, hadii laba fadhiid sidaas si le'eg, maanta waxaynu joognaa in mid bararay labadii kale ay fadhiid noqdeen, nidaamkaasi waa kii talisnimada ee dictator-ka, haduu Golaha Wakiiladu check and balance ku samayn kari waayo xukuumada, haduu garsoorku wixii dastuurka iyo shuruucda waafaqsan tilmaami kari waayo oo odhan kari waayo xeerkaa ama talabadaas dawladeed waa waxba kama jiraan (nul and void) oo labadaasi sidaas u shiiqaan waxa kuu soo hadhay waa mid qudha, anigu waxaan qabaa waa mid qudha waa taas weeye, way taagan tahay, waliba iyana waxaa ka sii qaadaya wax qabiil oo hadii aad saxaafada u fiirsato iyo dadka meel fadhiya kii waxaad arkaysa mid qabiil wax ku difaacaya ama wax ku dhaliilaya oo kii wax dhaliila waxaa lagu odhanayaa ma halkaas

ayaad ka soo jeeddaa, kii difaacayana meel kale, Markaa hadii cidii lahayd ee Hay'addaha Qaranku hawshooda gudanayaan anigu waxaan qabaa maqaaxiyada umadu kumay muranteen, facebookga laguma murmeene taas waxaa keenay hay'addo aan shaqadoodii qabsan karayn.

Xaga Musuqmaasuqa waxaa la isla ogyahay in dawlad musuqmaasuq ku baahan aanay waligeed tamarin, haditday leedahay haday basrisan wayday xoolo umad kale cashuurtood laga soo gooyay inaan la siinayn oo la odhanayn hoo oo tana halkii aad tii hore marisay mari, nidaamkaaga markaad hagaasitato oo xoolahayaaga basrisato ayaa cid kale wax ku tari kartaa, ma maqalnay cid musuqmaasuq loo soo xidhay, dawladaha caalamka wixii qarsoomi karaya ayaa la xadaa inana daartaas oo taagan baa qof la guurayaa oo nidaam, si lagu siiyay iyo sharci lagu siiyay aan la garanayn.

Anigu waxaan qabaa war dalkan waxba uma noola, wixii caalamku kula macaamililahaana meesha ma yaalo, waxaa inala gudboon inay dib isugu noqono, xukuumadu isa saxdo, maxaa inaga khaldan la yidhaahdo, cid waliba waajibaadkeeda garawsato, midiba mida kale contorlka ay ku leedahay ka garawdo, cid waliba xaqa ay leedahay tan kale u ogolaato, dawlanimadu sidaasay u baahan tahay, waana ka baxay.

**Md. Maxamuud Axmed Obsiiye** *(19 min, 57 seconds)*: **-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha, iyo marti-sharaftaba dhamaantiin ASC, Mudanayaal horta halkan waxaynu ku joognaa matalaad, hadaynu waxaynu matalno diidayno oo Barlamaankii Somaliland aynu nahay aynaana aaminsanayn dhibteeday leedahay, waxaanu aaminsanahay dalakan iyo dadkaba inaan fikir iyo siyaasad wanaagsan ku hagno mucaarad iyo muxaafidba gacmaha la is qabsado oo Samir iyo dulqaad la isu yeesho.

Waxaan marka hore ku bilaabayaa Arrimaha Gudaha, waxaynu ku soo liibaanay arrimaha wada-tashiga iyo iskaashiga waxaynu samaysanay dastuur, hirgalinta dastuurkuna uma taalo xukuumada oo kaliya ee waxay u taal Xukuumada, Axsaabta, Shacabka iyo aqoonyahahnka ay ka qaybgalaan oo ninwalba wixii aqoontiisa iyo karaankiisu gaadhsiiyo wax ka sheego, markaa yaan arrinta meel uun la saarin oo xukuumada isla leh la odhan, waxyaabo badan baa loo baahan yahay in laga wada tashado oo la wada qabsado wixii dan guud ah ee inaga dhexeeya, hadii khalad yimaado in la saxo meesha way ku jirtaa.

Hadaan arrimaha Gudaha ka hadlo si xasilooni siyaasadeed loo helo waxaa haboon in doorashooyinku qabsoomaan, waa laga hadlay inay qabsoomaan, laakiin kaynu hadlin qaabka iyo siday u qabsoomayso, cabashooyin badan baa jira, bari, galbeed iyo gudbona cabashooyinku way jiraan, hadaynu eegno doorashadii 2005tii waxay ku qabsoontay heshiis saddex xisbi dhexmaray oo jiray, wuxuuna ahaa go'aankay gaadheen ama xeerkii mid mar kaliya la isticmaalayo, xeer walba oo yimaadana waxaa loo baahan yahay in

lagu saleeyo wixii maalintaas lagu heshiiyay, walina waxaa taagan wixii barigii lagu heshiyay, waxaa la yidhi si loo helo cadaaladaas aynu doonayno in la helo kala xadayntii Gobolada iyo Degmooyinka.

Sidaynu la socono xitaa Goboladii iyo Degmooyinkii waa la siyaasadeeyay, Madaxweyne kasta oo yimaadaana wuxuu ku darayaa dhowr degmo iyo Gobol taasi waxay keentay markay doorasho timaado lixdii Gobol Doorasho lagu salayn jiray shacabkii leeyahay Gobolkaas baan ahay kaas baan ahay oo kuwii cusbaa saraar iyo xaysimo oo kale ayaa yimi, Doorashadii 2005tiina waxay ku salaysnayd wax la yidhaahdo saami-qaybsi axsaab oo kursi walba Gobol buu u taagnaa, arrimahaas oo dhami waa waxa keenay in Xeerkaasi one time use noqdo, waxaa shardi laga dhigay si doorasho sax loo helo laba arrimood, kuwaas ahaa:-

- Kala xadaynta Gobolada iyo Degmooyinka iyo
- Tiro koob guud oo shacabka laga qaado si loo helo Gobol walba kuraastiisa.

Markaas baa dastuurkii loo noqon karaa hadii loo arko dan, laakiin hadaan taas la sameyn lama furi karo dastuur, sidaa darteed Xukuumada waxaan u soo jeedinayaa inay ku noqoto in qaabka kaliya ee doorasho sax inay dhacdo keenaysaa tahay labadaas qodob waana tan kaliya ee keenaysa doorasho xasiloon iyo oo sax ama wax la yidhaahdo geedi socodka Nabadga iyo Dimuqraadiyada, saami-qaybsiguna taas ayuu ku iman karaa oo laga heshiin karaa oo marka degmo walba tirakoobkeedii lahayo degmooyinkiina kala xadaysan yihiin ayaa la heli karaa.

Taas macnaheedu maaha inaanu diidayno in la doorto ama Golahani sii joogo, waxaanu ku adkaynayaa in Golahani wakhtigiisii soo qaatay dakana iyo dalkana wax qabadkisii uga faa'ideeyay, hadii xeerka lagu heshiiyo wixii lagu heshiiyo khayr baa ku jira oo heshiisku waa khayr oo waa la soo dhowaynayaa, saldhiga cadaaladuna halkaasay taale Xukuumadu waa inay ka dedaashaa.

Dagaaladu way soo noq-noqdaan, hore way u soo noqon jireen, waana wax laga xumaado, xukuumad markay dhisan tahay sidaynu hore dhaqan ugu lahayn in Hubku gacanta dawlada ku jiro oo aanu ku jirin gacanta dadka, sidaa darteed baa Somaliland ay soo saartay laba xeer oo ay ku faanayso horumarna ku gaadhay, mid waa Xeerka 1999kii hubkii cuslaa loogu wareegayay Dawlada, kan kale waa hubka fudud oo isna Xeer loo sameeyay markii dambe 2010kii, labaadaas xeer waa kuwo xakamaynaya hubka, waxana muhiima in labadaas xeer laga hirgaliyo meel kasata oo Xukuumadu joogto oo la hirgaliyo.

Waxyaabaha Xasiloonida gudaha keenaya waxaa ka mid ah ku dhaqanka Dastuurka iyo Shuruucda dalka, xukuumaduna waa inay u dhaga nuqlaataa waliba waa xukuumad hal ku dhigeedu ahaa yahayna sareynta sharciga, markaa waa in Xeerarku waxay qorayaan

la hirgaliyo gaar ahaan Xukuumada ilayn iyadaa fulintii leh ay fuliso wixii dhaqaaqi waaya.

Waxaa muuqata baryahan in muran ka dhasho xeer Golaha Wakiiladu uu ansixiyay oo la leeyahay sidaasay Golaha Wakiiladu leeyihiin iyo sidaasay xukuumadu leeday, dee Golaha Wakiilada ayaa saxsan hadii kale waa Maxkamada Dastuuriga ah la geeyo si ay fasirto, maaha in dadka la mashquuliyo, runtii way dhacday oo iminkaanu aragnay.

**Doodda Xog ogaal u-noqoshada Xaalada Dalka Maalinta 3aad**

**Gudoomiyaha: -** Mudanayaal Waxaa inoo soconaysa dooddii Xog ogaal u-noqoshada Xaalada dalka, waxaan ku soo dhowaynayaa Xildhibaan Maxamuud Jaamac Cilmi.

**Md. Maxamuud Jaamac Cilmi (Dable)** ***(6 min, 17 seconds)*****: - Waxaan** salaamayaa dhammaan xubnaha sharafta leh, runtii hadalka intii ugu mihiimsanayd Guddoomiye waa la yidhi oo maalmahan laga hadlayaa shir-beeleediyo, shir wada tashiyo, talo qaraniyo. Waxa jiray oo shirnay dhammaan beelaha Somaliland isagu yimaadeen oo ku shiray Borama iyo Burco oo la soo noqday xoriyaddii iyo dawladnimaddii aynu lahayn. Markaa halkaas ayey wax kastaa ku hadhayaan, Markaa in la iska laabo dastuurkii oo shir beeleed lagu dhawaaqo. adduunka waxa jira marka inqilaab dhaco waxa ugu horeeya ee la laalaa dastuurka u yaala waddanka. Dastuurkaa haddii la laabo oo shir-beeleed oo wareego macnaheedu waxa weeyaan sharciyaddii waddanka u taalay halkaasay ku laabantay, markaa Somaliland shirarkii barriga ee aynu dhibaatada kaga gudubnay ayaa dib u soo noqonaya macnaheedu weeyaan.

Ninka siyaasiga ahi markuu dantiisa waayo waxa uu ku meeraystaa wixii dhibaato u keenaya umadda maaha. Dagaalkii labaad 1944 gabal warso ee Ruushka, Marayanka iyo igiriiska ninkii markii uu dagaalkii dhameeyey ayaa doorashadii laga helay, dimuquraadiyadda wanaageeda iyo waxay soo mareen iyaga oo qadarinaya ayuu u naheeyey ciddii ka heshay doorashada.

Siyaasiyiinta waxaan leeyahay danihiina shaqasiga ah ha eeginee waxaad eegtaan dhibaatadii umadda soo martay iyo maraaxilkii ay soo sareen. Ilaahay subxaana watacaala isagaa inoo sahlay inaynu halkan nabad ku joogno, kuwa jaarkeena ah maalin walba wax aka dhacaaya aad arkaysaan. Haddii kale balaayo dhan ayaa idin imaanaysa oo Iran leh oo xuuti leh, markaa sharciga umada u yaala waa in la ixtiraamaa. Kusigaaga markaad waydo waxbaa dhacaya oo shir-beeleed ayaa la qabanaya ha odhanin.

Waxa is qabsaday ninkii la odhan jiray godoliso iyo digool marka laba shaqsi is qabsadaan waxa la horumarinayaa ka guud, waxa markaa tanaasulay ninkii la odhan jiray digol.

Markaa sharciga waddanka u yaala iyo dastuurka waddanka loo baabiin maayo nin siyaasiya oo isagu danshaqsiya leh, markaa yaanu odhani shir-beeleed ayaa la qabanayaa, Golahana waxaan leeyahay ha soo saaro qaannuun ka mabnuucaya in nin iska yidhaa shir-beeleed ayaa la qabanaya, nin kale oo ku dhacaana ma jiro nin kastaana waa nin uu xadkiisa ku eekaadaa.

Waxaan leeyahay Golahu ha soo saaro qaanuun ilaalinaya Nabad, wada jirka iyo midnimada umadda si aanay u dhicin in cid kasta waxay doonto u sheegto.

Haddii aad wax ku dhawaaqdo oo qaarna kuu yimaadaan qaarna kuu iman waayaan saw dadkii maad kala leexin oo sharcigii iyo nidaamkii maad baabiinin, markaa siyaasiyoow umada ka daa waxaa aad dhex wado oo haddii ay wax dhacaan meel aad ku nabadgelaysaa ma jirayso markaa ka daa waxaa aad umada ugu baaqayso.

**Md Cabdiraxmaan Abubakar Good** *(13 min, 33 seconds)*: - Haddaan ku heereeyo xaalada arrimaha dibbeda oo ka hadlo, waxa jira is bedelka weyn oo ka socoda geeska Africa gaar ahaan itoobiya, taas oo saamayn weyn inagu yeelatay. Wax wey iska dhacaa, xaaladuhu way is bedelaan. Waxbaa la iska waydiiyaa oo la yidhaa sidaynu u wajihi karnaa, laakiin dhibaatada jirka waxa weeye xaaladaa is bedelaysa ee saamaynta dalkeena ku yeeshay aanay jirin cid wax iska waydiinaysaa. Hagaanka dalka waxa ah Mudane Madaxweyne muuse Biixi cabdi ilaa imika ma jirto talaabo uu qaaday waana nasiib darro weyn oo jirta. Suurta galna maaha in xaaladan la daawado waano in talo laga yeeshaa.

Xaga arrimaha gudaha ee nabada waxaad harkaysaa nabadii dalka oo soo ururaysa, iyada oo markii ugu horaysay magaalada Badhan lagu qabtay shirkii Golaha Wasiirada putland oo madaxweyne Putland ahi yimid oo intaas oo cisho uu joogay, iyada oo ay tahay meel ciidan oo Guddoomiye kuu joogo in Putland timaado, xaalada dalka si kale ayaa loo wadaa. Waxa layaab leh in Gole Wasiiro lagu shiriyo oo xitaa dhawr cisho uu jooga, waxaan leeyahay anigu xaaladan war ka soo saarno, warkaas oo ka hadalaya xaaladaas oo maxaa inoo hadhayba.

Xaalad sool beelo ayaa is laayey oo dagaaladu awalba way dhici jireen waana loo gurman jiray si iyo qaab gaar ahna waynu u xalin jirnay oo Guurtideena, odayaal dhaqameed Gobolada ka yimaad aduu si uun baynu u xalin jirnay, maanta waxa dhacday in ciidamo kale meesha yimaadaan oo kuweeniina ay meesha gali kari la'yihiin, maanta xaaladu siday u socoto Golahii Barlamanka Putland ayaa Laascaanood lagu dooranayaa oo beelii dadkii u matali lahaa dooranayaan waligeeda 27 may dhicin Gole Barlamaan oo putland oo Laascaanood gudaheeda laga doorto.

Wax way dhacaan laakiin waxa la iswaydiiyaa, sideeba looga hadlay, sideebaa la isaga yimid, sideebaa looga wada tashaday maba jirto taas, markaa Golahi waa inuu talaabo

qaadaa oo minuet Goluhu wuxuu u badan yahay ee la isku raaco la qoraa oo dadweynaha iyo madaxweynaha loo gudbiyaa waar fulintii waa isaga.

Haddaan eego Xaga xeerarka. Xeerarka ka soo baxa golaheena xeerku umadduu u dan yahay Madaxweynaha laftiisa ayuu dan u yahay. Xeer inta Golahu ansixiyey oo wareegto lagu dhaqangaliyey oo la saxeeya hadana wareegtana lagu joojiyey wali ma dhici, xeerka bani-aadambaa qoray, waxbaa laga tagi karaa, waxbaa seegi kara oo marka lagu shaqeeyo waxba soo bixi kara, laakiin dee habaa loo raacaa waa la bedelaa markuu yimaado, qodobada shaqayn waayaa wax ka bedel lagu sameeyaa xeer inta aynu samayno wasiir is hortaago canaanta koowaad waxa iska leh Shir-guddoonka. Maxayno ka fadhinaa oo aynu xeerar ka soo saarnaa haddii uu doonayo shaadh uu is leekaysiiyo oo kay doonaan wareegto uu ku joojinayo, maxay noqonaysaa xaalada dalku oo xeerarkii maxay noqonayaan.

Waxa kale oon arkaynaa cashuurihii oo xukumadu haddii ay cashuuro u baahato si ugu baahato waa la inoo soo gudbin jiray oo duruuf ayaa keeni jiray waana loo ansixin jiray ama waa laga dhimmi jiray oo dood ayaa laga yeelan jiray, cashuuraa la iska kordhinayaa waa qodob dastuuri ah waana dastuur jabin umaddii ayaa lagu kordhinayaa.

Waxa kale oo jira in la leeyahay tagaasidii la odhan jiray raaxada uma bixin karaa gobolada in wareegto lagu soo saaray. Waar xaaladuu gudaha ama xaaladii dibedda xaalado labaatan ama toban sano aan wada dhici karayn ayaa hal mar wada dhacaya tobankaa bilood ee xukumadani joogtay oo si xawli ah aad moodo inuu handaraab ku soo xidhayo, haddaba maxaa inaga inooga yaala oo haddii aynaan waxka ka qaban karayn umaddu way inaga eegaysaaye aynu is wada casilno.

Xukumadani waxay joogtay 11 bilood, haddii aad eegto xukumadihii ka horeeyey boqolka cisho ee u horeeya ayaa wax la qaban jiray, tana sanadkii oo ay madaxa la gashay irbad la qabtay ma jirto, waxa kale oo la soo saaray in mashaariicdii lagu daray boqolkiiba afar iyo sodon (34%) boqolkiiba labaatan iyo saayidna la joojiyey oo wareegto laga soo saaray, waar xagaynu u soconaa. Iyada oo aad arkayso in xukumadii tobankaa bilood ee aad arkayso ay ka sii darayso xaaladdii gudaha iyo xaaladii dibedduba. Heshiisyadii xukumaddii hore gashay waanay xukumada dambe xitiraamtaa oo la daayaa.

arrimaha saamigu xaalado badan ayey soo martay oo uu hormood ka ahaa madaxweynaha maanta dalka xukumaa Muuse Biixi Cabdi, waliba dadka aadka u taageersan ayuu ahaa, maanta xagay maraysaa xagay ku dhacday, xukumadihii ayaabad moodaa inay leedahay wax aanay haysana ayey doon doonayeen halkaas ayaanay maraysaa. Garan maayo malaha Madaxweynaha kalabaydh ilaa sheikh mooyee waxaad moodaa inaan inta kale aanay waxba ka khusayn dee suurto gal maaha inuu heshiisyadii jabaan, waxaan leeyahay saamigii waa in si deg deg ah loo galaa, intaas oo muddo ah

ayuu soo jiitamayey, wax kale oo loo dulqaataa ma jiro, 27 sanadood ayaa laga soo hadlayey, xaalad kale oo kolba la yidhaa waa sidan waa sidan wax suurto gal ah maaha.

Gobolka Awdal intaas oo jeer ayuu hadlay, xildhibaanada intaas oo jeer hadlay, halkanay ka tageen intaas oo jeer, la tashi farabadan ayey sameeyeen oo dadkoodii ugu tageen intaas oo jeer ayey ku noqdeen, waar maxaa laga rabaa kolkaas. Xaaladii ugu dambaysay ee afkiisa uu ka yidhi ee miidhiyaha uu ka yidha taas ayaa maanta looga fadhiyaa, suurto galna noqon mayso in la yidhaa hadhaw ayaa la qabanayaa. Waa in si deg deg ah loo soo saaro.

Saami qaybsigu halkan wuu ka dhammaaday oo halkeenan kuu ka dhamaaday, waxaana la yidhi arrintan talo qaran halag yeesho, maxaa kolkaas inagu soo celiyey maanta, muxuu halkan inoola yaalaa maanta, sawtii inta Gobolada laga soo maray go'aan laga soo saaray ee xisbiyadiina ka gudubtay ee Madaxweyne oo u qudha u taalay. Maxaa la inoogu soo celinayaa ma Golaha go'aan ka gaadhi kara maanta, shirguddoon inaad qabataanba may ahayn waana in dib loo celiya maadaama oo aynu hore ugu codaynay oo uu hore inooga gudbay inaga. Barrina waxa la soo wadaa marka ay ka hadha laba saddex bilood in la yidhaa xaalada ka gaadhi maynee ha la waxeeyo, taasi suurto gal noqon mayso. Xildhibaanada gobolka Awdal waanu isku noqon doonaa Gobolkiina talo ayaanu kula noqon doonaa, waxaan leenahay haddii ay nagu kalifto in aanu 13 xildhibaan iska casilno waanu is casilaynaa kolayto waanu ku talo jirnaa, laakiin waxaas u qaadi mayno dadka.

Waxaad arkaysaa heshiiskii uu goobjooga ka ahaa ee khaatumo ee shir kasta ka qaybgalay, waxaan leeyahay madaxweynuhu ha tixigeliyo go'aanadiisa iyoheshiisyada uu soo maray.

Hadaynu nahan xildhinaanada waxaynu matalnaa Gobolada, waxaynu matalnaa shacabka waxaynu nahay xildhibaano qaran, markaa waa in aynu doodeenan socotay go'aan ka soo saarnaa oo dadka iyo madaxweynahaba u sheegnaa Asalaamu calaykum waraxmatulahi wa barakaatu.

**Md Siciid Warsame Ismaaciil** ***(11 min, 02 seconds)*****: -** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Xildhibanada, shir-guddoonka iyo saxaafadaba waxaan ku salaamayaa salaanta islaamka ASC. Arrinta ah xogagaal u noqoshada xaalada uu dalku marayo waa arrin wax walba ka muhiimsan, laakiin haddii aynu maalin kasta dood sheegno oo aanay waxba ka soo bixin dee maalin walba aynu xiiqnaa wax macno ahna samayn mayso. Waxaynu u baahan nahay marka doodaasi dhamaato in go'aamo ka soo baxaan, haddii kale waxay noqonaysaa inaga oo sidii carruurta ku hadal baranayna meesha.

Waxaan ugu horaysiinayaa siyaasada arrimaha dibebba xiligii xukumadii u horaysay ee kulmiye qabsatay waxay maraysay in caalamku laba inoo kala qaado (Dowel Tracy policy) wax la yidhaa oo caalamku inoo kala qaado Somaliland iyo Somalia. Maalintii

ugu horaysay ee kulmiye qabsaday waxa laga bilaabay shaxaadtaga wadamada carabta, halkii laga shaqayn lahaa sidii dalkani u noqon lahaa mid caalamka ma mid ah. Waxaan xasuustaa intaanu kulmiye qabsan dalka in AU-yada lago soo diray (Fact find mission) uu hogaaminayey alpha cumar canary oo ahaa guddoomiyihii golaha African union.

Waxaad arkaysaa warbixintay qoreen in suurta gal u tahay in lagu aqoonsado Soamliland mid sharci iyo mid kaleba, halkii lagama qaadin waxa la bilaabay wax la yidhaa wada hadalada Somaliland iyo Somalia. Halkaas waxa ku lumay dowel tracy policy-gii iyo warbixintii midawga afrika oo ahayd in la tixraaco. Sidaas ayaana lagu ilaabay, waxaana la bilaabay shaxaadka shirkado carbeed oo la daba ordo, waxaan halkaas lagu lumiyey gooni isu taagnimadii.

Waxaan xasuusto in maalintii ugu horaysay la yidhi madamada carrabta ayaanu heshiiska ka raadinaynaa, waar miyaanay ahayn kuwii ina aasay. Mida kale ilaa imika ma jiro wada hadaldii Somaliland iyo Somalia wax is afgarad ah oo laga gaadhay, imika ma muuqato qorshe lagu qiimaynayo tii hore ama ta dambe loogu talo galay oo stretigic-yada ah oo ka leedahay Wasaarada Arrimaha Dibbeda Somaliland.

Wasaaradii dhamayd ee arrimaha dibeddu waxay ku soo ururtay boorsada Sacad Cali Shire, isaguna waxa uu dibebba u meeraystaa sidii uu u heli lahaa shirkado wax lala galo, waxa soo xidhmay safaaradihii aynu dibedda ku lahayn, waxa ay taasi noqonaysaa in wasiirka loo yeedho waxna laga waydiiyo, Iyana waxa muhiim ah in xukumadu la timaado qorshe cad oo lagu raadinayo aqoonsiga Somaliland.

Waxa kale oo Iyana ka socda geeska Africa arrimo aad u culculus oo tilifoono lagu dhammeeyey, xukumadu ha sheegto waxa la qarqarinaayo eek a socda Addis sababa, ee mar horena ka dhacay waddanka Sucuudiga ee ay ku kulmeen Raysalwasaaraha Itoobiya iyo Madaxweynaha Eratariya, waxa la odhan jiray Berberi wax go' lagu qaado ka weyn, waar Somaliland qarsoodi ku iibsami mayso waxa la wado waa la ogyahay ee ha la keeno oo goloyaasha ha lagala tashado.

Arrimaha dhaqalaha, waxaad ogtihiin in sicir bararku wali halkii ayuu taagan yahay, shaqo la'aantii halkii ayey taagan tahay, xukumadu cashuur kordhin mooyee qorshe kale lamay iman, waxa ilaa imika la kordhinayaa cashuur ku dhacaysan hooyada danyarta ah ee suuqa xabuubta ku iibinaysa.

Xukumadihii hore waxaabay golaha la iman jireen nooc ka mid ah cashuuraha la kordhinayo. Laakiin tani waxaabad moodaa in golihiiba ay ka maarantay oo wasiir kastaa isagu cashuur gaar ah samaystay.

Wasiirka gaadiidka iyo horumarinta jidadku waxa uu daaf furay liisamo cusub oo uu leeyahay kuwii hore waa la bedelay, marka liisan la bedelayo maaha inin kastaa inuu sumadii geelooda inala soo doonto, waxa loo baahan yahay in liisanka qaranka uu xeer

sheego oo uu tilmaamo waxa ku qoran, waxa qarsoon, warbixinta laga rabo inuu xeer tilmaamo ayaa la rabay. Waxa uu wasiirku keensaday inamo uu kala yimid guryahooda iyo mashiin. Maalin lala noqonayey liisankaa iyo wixii wehelinayey waxa wareegatadu sheegtay in madbacada qaranku hayso, waxaan loo abuuray madbacada qaranka inay ilaaliso dokumantiga sirta ee madbacada qaranku hayso. Looguma talo galin meelo gaar ay hayso ama samayso ducomentiga qaranka.

Waxa la qabtay liisamo badan oo koobi ah waxaanay ahayd sababta loola wareegay liisamada oo nin kastaa gurigiisa la hoos tagay, waxaanay in madbacada qaranku daabacdo banka dhexena la dhigo. Laakiin waxaad moodaa in wasiir kastaa hayso meel u gaar ah oo gurigiisa ku daabacanayo waxaanad moodaa nin wasiir kasta meel la tagay, wasiir kasta iyo agaasimihiisii way ishaystaan, waxaan ugu dambeeyey wasiirka maaliyada iyo xisaabiyaha guud oo dhaawacaysa nidaamka maaliyadda.

Arrimaha gudaha waxaad moodaa in xuduudkii Somaliland ku soo ururay afar gobol oo kaliya, sanaag barri wuu go'ay Soolna waxa la keenay ciidamo amisom oo aanay ciidankeenii amarka cidna ka qaadanayn oo aanay gelin Karin.

Waxa dhacday markii ugu horaysay in xeer golayaashu soo saareen oo madaxweyne saxeexay oo faafintii rasmiga ahayd galay uu wasiir wareegto ku joojiyo, waxaad moodaa in shirkaddii ay wasiiro iska yeesheen oo ay sidayn doonaan yeelayaan oo hantidii dawladana la wareegay oo baawarkii dawlada la wareegeen. Arrintu waxay maraysaa luwiskii 14 oo odhan jiray dadku maxay doonayaan, rooday waayeen oo haddii ay roodhi waayeen miyey keega cunaan.

Waxa jira jira caddaalad darro xoogan oo aad moodaa in khayraadkii gobolo kaliye qaateen, laakiin haddii hore ay taasi u dhici jirtay tani dhicimayso waxa lagu qaybsan beelo markii wax wada qaybsigii la waayey.

Waxa jiray heshiisyo lala galay oo la galay khaatumo oo aad moodo in xukumadu markii doorashada gashay ay meesha ka saartay waxaanay ahayd arrin aad u muhiim ah caalamkuna soo dhaweeyey meel alaale meel uu heshiiskaa cali khaliif uu ku dambeeyey la garan maayo, waxaan ku soo gabagabaynayaa doodani waa inay noqotaa mid go'aamo ka soo baxaan oo midho dhasha.

**Md Ibraahim Axmed Reygal** ***(19 min, 04 seconds)*****: -** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Bahda saxaafada iyo marti sharafta xaga dambe fadhida way salaaman yihiin, waxa kale oo idin soo salaamaysay jaaliyadda ustureeliya iyo nayuu ziilaan.

Dadku waxay khaati ka joogaan guddoomiye hebel oo afka furtay, beel hebla oo afka furatay, waxaan leeyahay ilaahay afka ha noogu furo wax wanaagsan. Soomaalia oo dhan ayaa leh arrintaas.

Ganacsiga korabshanka lagu sameeyey waxaan la hadalayaa Somaliland oo aasaaska Somalia ahayd, waa waqooyi barri, waxba ma jiraan waxbaa tuko raq lagu soo tuurtuurayaa, kilarkii ayaa u soo gurmaday madaxweyne mustafe ayaa raashin keenay waliba kala soo qaybgal nabadaynta Somaliland, jabuutina haddii ay nabadaynta Somaliland ku soo qayb qaadan waydo saylac ayaa ku soo ururi doontaan.

**Md Maxamed Cumar Aadan (Jiir)** *(16 min, 35 seconds)*: **-** Guddoomiye dad badan ayaa meesha ka hadlay, bani-aadamka ilaahay waxa inoo sheegay inay kala jaad yihiin, afkastaa afkaartiisa ayuu hadlaa khalad iyo sax wuxuu doone ha ahaadee waxaan odhanaya waxay aniga ila tahay.

Waxa dhawr jeer laga hadlay oo la isku tuur tuuray oo dawlada lagu dhaliilayey. Horta waxaan odhan lahaa intaanu qofku wax dhaliilin waa inuu yidhaa maxaa qof kan hadalkan ka keenay, qofka waad in aad is waydiisaa maxaa qofka hadalkan ka keenay.

Runtii dawlada ahaan maynaa dhigan waxa dalwad lagu hogaamiyo, manaynaa dhigan aqoontaa dawlada lagu hogaamiyo.

Run ahaantii Mujtamaceena iyo dadkeena Somaliland waxaad moodaan in waxa mujtamac laga sugo aan la inaga sugi karayn waxaad moodaa in dadkeenu qaybsan yahay, waxaynu arkaynaa inaynu faqiir nahay, waxaynu arkaynaa in mashaakil farabadani ina haysto oo ay ka mid tahay dhaqaalo xumo, waxa kale oo ina haysta mid miltaray, waxaan looga baxaa in dadku marka hore is aaminsan yahay oo dawlada timaada leedahay mabaadii oo ay soo dhigaan dadkuna ku doortaa, oo iyaga laga sugo siday wax odhanayaa oo aad moodo iyaga oo sanad kaliya jira inay deg degayno. Waxaynu ognahay miisaamiyadda la keeno iyo waxay tahay waanan ognahay waxay ku baxdo.

Ma odhanayno khalad ma jiro oo bani-aadamku khalad wuu sameeyaa, laakiin aynu is waydiino khaladaadku ma intentional baa, ma qaar loo qasdiyeybaa ma mid khibradiisu siisaa, maaha in qofka fikirkiisa lagu caayo, u jeedooyinbuu leeyahay waxbuu is leeyahay qabo waxaana laga yaabaa inaanu xumaan uga jeedin, waxaan markaa anigu yar taataabanayaa mushkilado ina haysta; -

Horta xildhibaanadu waxay yar taataabteen Madaxweynaha Putland oo badhan yimid oo shirkii Golaha wasiirada ku qabsaday ayey ka yar hadleen, laakin anigu ma waraysan iyaguna way ka hadlayeen laakiin maxaa ku kalifay ma u warhaynaa.

Ma dadka meesha jooga ayeynaan doonayn in dhibaato ay ina dhex marto, mise dawladaan talaabo military aan qaadi Karin oo aanay doonayn dadkan kala daadsan ee qabyaaladu ragaadisay oo haddii nini halkaas isa soo taago oo la odhanayo waar horta kaasi yuu ahaa.

Waxa weeyaan ma garanayno oo suldaankii meeshaas ayaa watay gurigiisa ayuu geeyey, waxay ka wada hadleen garan mayno, haddii aynu talaabo qaadi lahayn garan mayno talabaada, meeshaa dhibaato kai man lahayd. Waxaan maqlay in qolo madax bannaan inta ay martay qirtay oo tidhi putland ayaa waxaas gashay oo gardaran, waxaanan filayaa intaasi aanay dawladu ay sidaas uga jeedo.

Waxaad moodaa dadka golayaasha ku jiraa ina aaay fahmin doorkooda, meesha qofku constituency wax la yidhaa ayuu ka hadli karaa somalina ma kala soocnoo meel aanay cid kale ku dhex jira ma jirto. Meesha aad degan tahay ilaahay ayaa leh, markaa bahashan qabyaalada la yidhaahdaa way ina curyaamisay, oo meeshii ay xukumadu tidhaa macdan ayaa laga qodayaa la yidhaa meesha waa xuduud kayaga oo ma soo galaysaan waana dhibaato, waxaanay noqtay meel kasta inay ciddi sheegatay. Taasi markay dhacday oo magaalooyinkii la kala sheegtay waxa dhacday in dadkii imana laha iyo bulshaddii kuwada noolayd ay yaraato oo magaalooyinka qaar caalamka qaay ayey ku nool yihiin 20 million, inaga waxaad moodaaba inay hal magaalo ina qaadi karto markaa waxa ina baabiisay qabyaalada.

Waxaan aad uga xumahay in qof dhan oo constuency dhan matalayaa inuu soo istaago uu yidhaa reer hebel Ayaan u hadlayaa aad ayaanan uga xumahay arrintaas, waxaanan garan waayey ma garashay ka tahay mise jaahilnimo waa wax aad loola yaabo.

**Miyigeena iyo deegaankeenii:** Miyigeenii waynu ognahayoo sanadihii ugu dambeeyey oo dhan wuu sii xumaanaayey, wuu baaba'aayey waxyaabo badan baan sababay. Dawladay tahay inay baadhaan inagu soo jeedin waynu samayn karnaa, laakiin xukumadu u taal inay baadho oo la fahmo maxaa deegaankan baabiiyey. Ma dhirtan la jarayaa deegaanii kharibay, ma dadkiiba gobaya oo xumaynaya waana in la fahmaa oo wixii lagu dhaqaaqo ayaa muhiim ah haddi lagu dhaqaaqi karo.

Magaalooyinkeenii waa waaweynaadeen wixii la samayn karayeyna waa la sameeyey oo private sector ka mid yihiin, ama jaamacado ha laga sheego ama secondary halag sheegee qaarkood yihiin ama qaarkood ha noqdeen go'aamo la sheego. Waxaynu u baahan nahay laba wax, labadaas wax waxa weeye:

1. In tacliintu noqoto mid ku dhaw dadka reermiga ah wakhti siisa siday xoolahooda uga faa'iidaystaan wax la odhan jiray waxbarashada dadban (Basic Education) oo uu soo saaray Julius nyerere. Waxa kale Iyana muhiim ah in technical education-kii la badiyo si dadku u shaqaysan karo waxna u dhisan karno.

Waxa kale oo aan ku kordhin lahaa xoolihii miyigu way xumaadeen jawigii, hawadii iyo roobkiina wuu yaraaday shaqo darro ayaa ka dhacday oo dadkii xoolaha mashquulka ku ahaa ayaa ka yimid oo balwadana iyo qaadna inoogu darsameen. Caanihii xoolaha laga

lisaayey ee carruurta la siinayey qaad ayaa la siistaa, markaas waxa halkaas ka dhalatay shaqo la'aan taasina waxay keentay in ay magaalooyinkii dadkii soo galaan oo magaaladii oo inamo badan oo mutacalimiini ka soo baxayaa reermigiina yimid, iyagan cidhiidhigaas ayaa ku dhacay.

Dhanka kale shaqaalaynu way socotaan waliba dhanka gaarka loo leeyahay, waxay samaysteen Cusbitaalo, warshado iyo shirkado shaqaalayntooduna aad ayey u wanaagsan tahay, laakiin dhanka dawladda garan mayno waxay sanadkan inoo keeni doonto, laakiin waxa wanaagsanaan lahayd inay ku darsato in shirkado loo abuuro dhalinyarada oo lacag la amaahiyo.

Runtii anigu waxaan qawadsanahay labad wasaarood oo kala ah Wasaarada Ganacsiga iyo waasarada Warfaafinta, waxaanay baadhid sameeyaan ku saabsan qiimaha ganacsiga ee adduunka dadkana waxbay u tari lahaayeen. Wasaarada warfaafinta waxaan odhan lahaa in ay ka hor istaagaan dadka qabyaalada lagu mabnuuco, waxaan inaga soo joodin lahaa in aynu soo saarno xeer la dagaalamaya qabyaalada oo waana in mudanaha golaha laga mabnuuco inuu Golaha dhexdiisa kaga hadlo qabyaalad. Waanad mahadsan tihiin Guddoomiye intaas Ayaan ku soo gabo-gabeeyey.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| ------------------------------------------------ | ---------------------------------------- |